

**Wisconsin**

**Buug-yaraha Xubinka  
BadgerCare Plus  
Medicaid SSI**

**[www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin)**

## Ku soo dhawoow ee Anthem Blue Cross and Blue Shield!

Waxaanu ku faraxsanahay in aad tahay xubinkeena waxaana rajaynaynaa in aynu kugu caawino caafimaadkaaga. Waa doonaynaa in aynu hubsano in aad ku biloowdo biloow wanaagsan sida xubinkeena ahaan. Buug-yarahaan xubinka waa hagahaaga ee kugu hagaya dhammaan adeegyada daryeelka caafimaadka aad heli kartid.

Buug-yarahaan wuxuu kuu sheegayaa:

- Sida loo isticmaalo qorshahaaga daryeelka caafimaadka si aad u ahaatid qof caafimaad qaba una heshid daryeelka adiga kugu habboon.
- Maxay yihiin dheefaha iyo adeegyada ah sida qayb ka mid ah qorshahaaga.
- Qofkee la wacayaa marka aad qabtid su'aalo.

Waxaa khasab kugu ah in aad heshid dhawr khayraad kale oo yar oo la socda buug-yarahaan si aad u fahantid sida loo isticmaalo qorshahaaga caafimaadka.

Ahaantaada qof Anthem ka mida, waa inaad adeega caafimaad ka heshaa dhkaatiir iyo cosbitaallo ka mida qorshaha Anthem. Waa eegtaa hagaha adeebixiyaasha Anthem ee ay ku liis garaysanyihii dhakhaatiirtaasi. Waxaa ka arki kartaa hagaha adeebixiyaasheena bogga internetka [www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin). Sidoo kale waxaad wici kartaa qaybta adeega xubnaha ee Anthem oo aad codsan kartaa in boosta laguu soo mariyo hagaha adeebixiyaasha oo daabacan. Takhtarada oggolaanaya bukaanada cusub waxaa lagu calaamadeeyay daliilka bixiyaha adeegga.

Anthem waxa uu kuu daboolayaa adeegyada caafimaad ee caymiska BadgerCare Plus ama Medicaid SSI. In yar ayaa waxaa ceymiyay dowladda. Eeg *qorshaha iyo adeegga goblka* si aad xog dheeriya u heshid.

Haddii aad waydiimo qabtid inta aad akhrisanaysid Buugayarahen, fadlan waxaad eegtaa qaybta *xidhiidhada muhiimka ah*. Qaybtaan waxaa ku qoran lambarka telefoonka iyo mareegtooyinka aad wici kartidama booqan kartid si aad u heshid jawaabaha su'alahaaga. Anagu kaliya waxaynu kuu jirnaa hal tallaabo ama wicid.

**Waxaanu kaaga mahadcelinaynaa inaad inaad tahay xubinteenaa.**

Daacadnimo,



Anthony Woods  
Medicaid Madaxa Adeega  
Anthem Blue Cross and Blue Shield

# Adeegyada Turjumidda

**ATTENTION:** If you speak English, language assistance services are available to you free of charge. Call 1-855-690-7800 (TTY: 711).

**ATENCIÓN:** Si habla español, los servicios de asistencia de idiomas están disponibles sin cargo, llame al 1-855-690-7800 (TTY: 711).

CEEB TOOM: Yog koj hais lus Hmoob, kev pab rau lwm yam  
lus muaj rau koj dawb xwb. Hu 1-855-690-7800 (TTY: 711).

注意：如果您说中文，您可获得免费的语言协助服务。请致电1-855-690-7800 (TTY 文字电话： 711).

DIGTOONI: Haddii aad ku hadasho afka Soomaaliga, adeegyada caawimaadda ee xagga luqadda waa kuu diyaar iyagoo bilaash ah. Wac 1-855-690-7800 (TTY: 711).

**ВНИМАНИЕ:** Если Вы говорите по-русски, Вам будут бесплатно предоставлены услуги переводчика. Позвоните по номеру: 1-855-690-7800 (TTY: 711).

ကျေးဇူးပြု၍ နားဆင်ပါ - သင်သည် မြန်မာစကားပြောသူဖြစ်ပါက၊  
သင့်အတွက် အခမဲ့ဖြင့် ဘာသာစကားကူညီရေး ဝန်ဆောင်မှုများ  
ရရှိနိုင်သည်။ 1-855-690-7800 (TTY: 711) တွင် ဖုန်းခေါ်ဆိုပါ။

**تنبيه: إذا كنتم تتحدثون العربية، توفر لكم مساعدة لغوية مجانية. اتصلوا بالرقم 1-855-690-7800 (هاتف نصي: 711).**

**PAŽNJA:** Ako govorite srpsko-hrvatski imate pravo na besplatnu jezičnu pomoć. Nazovite 1-855-690-7800 (telefon za gluhe: 711).

**ACHTUNG:** Wenn Sie Deutsch sprechen, stehen Ihnen kostenlos Sprachhilfsdienste zur Verfügung. Rufen Sie die folgende Nummer an: 1-855-690-7800 (TTY: 711).

**주의:** 한국어를 쓰시는 경우, 언어 지원 서비스가 무료로 제공됩니다. 1-855-690-7800 (TTY: 711) 번으로 연락해 주십시오.

**CHÚ Ý:** Nếu bạn nói tiếng Việt, thì có sẵn các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí cho bạn. Hãy gọi 1-855-690-7800 (TTY 711).

**GEB ACHT:** Wann du Pennsylvaanisch Deitsch schwetszcht, Schprooch Helfe Services sin meeglich mitaus Koscht. Ruff 1-855-690-7800 (TTY: 711)

**ATTENTION :** Si vous parlez français, les services d'assistance linguistique vous sont accessibles gratuitement. Appelez le numéro 1-855-690-7800 (TTY : 711).

**UWAGA:** Jeśli mówisz po polsku, usługi wsparcia językowego są dostępne dla Ciebie bezpłatnie. Zadzwoń pod numer 1-855-690-7800 (TTY: 711).

## **La xidhiidhkaagu waa muhiim**

Dadka qabba naafooyinka ama dadka ku hadla luuqad aanan ahayn luuqada Ingiriiska, waxaynu ku siinaya adeegyadan si bilaash ah oo aan adiga wax lacag ah kuugu fadhin:

- Turjubaano luuqada dadka dhagoolayaasha ah kuwaas oo u qalma
- Qalab ku qoran khad waaweyn, dhagaysi, eliktaroonig, iyo qaabab kale ah
- Caawimaad ay kugu caawiyaan turjubaano u qalmo luuqada aad ku hadashid
- Qalab ku qoran luuqada aad ku hadashid

Si aad u heshid adeegyadan, wac lambarka Adeegyada Xubinka ee ku qoran kaarkaaga Aqoonsiga. Ama waxaad la xidhiidhikartaa lambarka Abuukaatooyinka xubinnada ee

**1-262-523-2424.**

## **Muhiim Xogta xidhiidhka**

### **Anthem Adeegyada Xubnaha**

Wac lambarkan Isniinta illaa Jimcaha laga bilaabo 8 a.m. illaa 5 p.m. wakhtiga gudaha ama booqo bogga internetka xubinka si aad:

- U heshid jawaabo ku saabsan su'aalaha guud ee dheefaha.
- Raadi ama bedel takhtarkaaga.
- Hel maclumaaad ku saabsan maamulida kiiska caafimaadka ama adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka.
- Codso adeegyo turjumaan qoraal ama afka ah oo bilaash ah.
- Barro sida lagu helo telefoon bilaash ah si aad noo soo wacdid marka aad u baahatiid caawimaad laguugu caawiyo baahiyaha daryeelka caafimaadka.

1-855-690-7800

(TTY 711)

[www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin)

<b>24/7 NurseLine</b> (laynka kaalkaaliyaha caafimaad 24/7) Wac lambarkan si aad ugula hadashid si khaas ah kalkaaliso. Waxaad soo wici kartaa khadkan 24 saacadood maalintii, todobada maalmood todobaadka.	1-855-690-7800 (TTY 711)
<b>Daryeelka degdega ah</b> Haddii aad u baahan tahay daryeelka xaalada deg-degga ah, wac 911 ama booliska deegaankaaga ama waaxda adeegyada xaalada deg-degga ah.	911
<b>ForwardHealth Adeegyada Xubnaha</b> Wac lambarkan Isniinta illaa Jimcaha laga bilaabo 7 a.m. illaa 6 p.m. wakhtiga gudaha si aad u weydiisid su'aalo ku saabsan: <ul style="list-style-type: none"><li>• Dheefaha ay dowladdu ceymisay iyo haddii aad u qalantid dheefahaasi.</li><li>• Dib u cusboonaysiinta dheefahaaga.</li><li>• Soo sheegida isbedelada, sida cinwaan cusub ama lambar telefoon.</li></ul> Sidoo kale waxaad ku heli kartaa maclumaadkan online-ka. Kaliya gal xisaabtaada MyACCESS eeku taal access.wisconsin.gov.	1-800-362-3002 <a href="http://access.wisconsin.gov">access.wisconsin.gov</a>
<b>Anthem Abuukaatooyinka xubnaha</b> Wac ama iimayl u dir abuukaatahaaga xubinka haddii aad qabtid su'aalo ama arrimo la xiriira dheefahaaga.	1-262-523-2424 <a href="mailto:WIAnthemMedicaidMemberAdvocates@anthem.com">WIAnthemMedicaidMemberAdvocates@anthem.com</a>
<b>Gaadiidka caafimaad ee aan degdega ahayn — Maamulka gaadiidka caafimaadka (MTM)</b> Wac ama gal internetka si aad u diyaarsatid gaadiidka lagu aado ama looga yimaado booqashooyin takhtar/caafimaad kuwaas oo ah qayb ka mid ah dheefahaaga. Wac si aad u diyaarsatid gaari raacida ugu yaraan ka hor labbo maalin inta aadan samaysanin ballanta booqashooyinkaaga.	1-866-907-1493 TTY 711 <a href="http://www.mtm-inc.net/wisconsin">www.mtm-inc.net/wisconsin</a>
<b>Daryeelka indhaha — daryeelka indhaha ee March</b>	1-855-516-2724 TTY 1-877-627-2456 <a href="http://www.marchvisioncare.com">www.marchvisioncare.com</a>

Wac ama gal internetka si aad u heshid  
bixiye daryeelka aragga ama u oggaatid in  
badan oo ku saabsan dheefahaaga aragga.

**Daryeelka ilkaha**

**DentaQuest**

DentaQuest waxa uu xubnaha u gudbiyaa  
adeega caafimaadka ilkaha haddii ay ku  
suganyihiin degmooyinka Kenosha, Milwaukee,  
Ozaukee, Racine, Washington iyo Waukesha  
dagmmyinka . Haddii aad ku sugantahay  
dagmooyimnkaa, wac ama bogga internetka  
adeegso, si aad xog dheeraad ah oga heshid  
adeegyada caafimaadka ilkaha ee DentaQuest  
ama aad u heshid adeeg bixiye xagga  
caafimaadka ilkaha.

1-888-271-5210

TTY 1-800-466-7566

[www.dentaquest.com](http://www.dentaquest.com)

**ForwardHealth Adeegyada Xubnaha**

Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan  
degmooyinka Kenosha, Milwaukee, Ozaukee,  
Racine, Washington iyo Waukesha, waxaad wici  
kartaa lambarkan ama waxaad gali kartaa  
internetka si aad u oggaatid wax badan oo ku  
saabsan dheefahaaha ilkaha.

1-800-362-3002

[access.wisconsin.gov](http://access.wisconsin.gov)

**New Baby, New Life<sup>SM</sup> (ilmo cusub, Nolol  
cusub) Barnaamijka Maamulidda**

1-262-523-3680

**Dhalmada**

Haddii aad tahay hooyo ilmo rajaynaysa ama  
haysata ilmo hadda dhashay, soo wac si aad u  
oggaatid wax badan oo ku saabsan taageero  
fool-ka-fool ah, jawaabo ku saabsan  
su'aalahaaga iyo caawimaad ka dhigaysa  
adiga iyo ilmahaagaba kuwo caafimaad qaba.

1-800-722-2295

[www.dhs.wisconsin.gov/wic](http://www.dhs.wisconsin.gov/wic)

**Barnaamijak (WIC) ee Dumarka,**

**Dhallaanka, iyo Carruurta**

Wac ama gal internetka si aad u oggaatid  
wax badan oo ku saabsan barnaamijka  
Dumarka, Dhallaanka, iyo Carruurta,  
midkaas oo siinaya cunto caafimaad leh  
haweenayda uurka leh iyo hooyooyinka  
haysta carruur yar-yar.

**211 Khadka khayraadka bulshada**

Wac ama gal internetka si laguugu xiro  
khayraad iyo macluumaa laga helo gudaha  
bulshadaada.

211 ama 877-947-2211

[www.211wisconsin.org](http://www.211wisconsin.org)

**Daryeelka caafimaadka ee hab-dhaqameed**

1-855-690-7800 (TTY 711)

Wac haddii aad u baahantahay caawimaad  
laguugu caawiyo wel-welka, murugada,  
walaaca, xad-gudubka khamrada/daroogada  
ama dhibaatooyin kale oo hab-dhaqan ama  
caafimaadka maskaxda ah.

Lambarada TTY waa adeeg dadweyne bilaash ah oo loogu talogalay xiriirka u dhaxeeya dadka isticmaala codka caadiga ah iyo dadka dhagoolayaasha ah ama dhib ku tahay in ay wax maqlaan. Fadlan isticmaal lambaradan kaliya haddii aad tahay qof aan wax maqlin ama hadli karin.

# Anthem Blue Cross and Blue Shield

## Buugayarah xubinka

N17 W24340 Riverwood Drive • Waukesha, WI 53188

1-855-690-7800 • TTY 711

[www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin)

### Tusmo

---

<b>Adeegyada Turjumidda .....</b>	ii
<b>Muhiim Xogta xidhiidhka.....</b>	iv
<b>Bilawga.....</b>	1
Bedelidda xogtaada xidhiidhka .....	1
Haddii aad guurtid .....	1
Qiimaynta Daryeelka/Cabirka daryeelka caafimaad ee loo baahanayahay.....	2
Isticmaalkaa kaararkaaga aqoonsiga .....	2
Bogga internetka ee xubinka Anthem .....	3
Adeega mobilka Anthem Medicaid .....	4
Doorashada adeeg bixiyaha gudd .....	4
Bedelidda bixiyaha guud ee daryeelka.....	5
Miyi dage (HMO kaliya oo degmadau leedahay) .....	5
<b>Helidda daryeelka ad u baahantahay.....</b>	6
Daryeelka dhakhsaha ah.....	6
Daryeelkaaga markaa aad dhoofsantahay .....	7
<b>Goormaalugu soo dallacayaa biilka adeegayada .....</b>	8
Ceymisan iyo kuwa aan cwymisnay .....	8
La bixinnda .....	8
Daryeelka caafimaad ee laga helay debedda Wisconsin .....	8
Ceymisyada kale .....	9
<b>Ceymiskan iyo gobolka adeegyadooada.....</b>	9
Anthem dheefaha.....	9
Faaidooyinka caymis gobolka .....	11
Ogolaanshaha hor dhac ah.....	12
Tilmaamta faa'idoyinka .....	13
Caafimaadka dhimirka iyo and adeegsiga maandoorayaasha dheefaha.....	13
Qorshaha qoyska dheefaha .....	14
Daryeelka ilkaha.....	14
Dhayida iy toosinta laf dhabarka Dheefaha.....	15

Vision dheefaha .....	15
Daawaynta Autismka Adeegyada.....	16
HealthCheck adeegyada .....	16
Transportation faa'idooyinka .....	17
Faa'idooyinka armashiiyaha.....	17
Adeegyada daryelka shakhsiga ah.....	18
Helidda aragti takhtar labaad.....	18
Helidda koox xirfadyaal caafimaadeed .....	18
<b>Addegyo aan ku jirin ceymiska Anthem ama gobolka.....</b>	<b>18</b>
<b>Helidda daryelka muddada uurka iyo umulidda .....</b>	<b>19</b>
Faa'idooyin muddada uurka iyo umulidda.....	19
Uurka halistiisu sarrayso .....	20
O helidda faa'idooyinka ilmaha .....	20
New Baby, New Life <sup>SM</sup> barnaamijka maamulida hooyonimada.....	20
Barnaamijka haweenayda, dhallanka, iyo caruurta .....	24
Text4baby .....	24
<b>Healthy Rewards Barnaamijka.....</b>	<b>24</b>
<b>Barnaamijyada maamulidda caafimaadka.....</b>	<b>26</b>
24/7 NurseLine .....	26
Maamulidda cudurrada (DM).....	26
Adeegyada maamulidda daryelka ee kale .....	28
Barnaamijka Lifeline .....	28
<b>Ka dhaafitaanka HMO .....</b>	<b>29</b>
<b>Caawimaad xubnaha baahyo xagga xidhiidhka leh .....</b>	<b>29</b>
Caawimaad afaf kale ku saabsan.....	29
Caawimaadda xubnaha la' codka, wax maqalka ama wax araga.....	29
Digreetada dadka mareykanka ee naafada ah ee 1990 .....	30
<b>Helidda mucaawimada markaad su'aalo ama mushkilad qabtid.....</b>	<b>30</b>
Anthem's xubinnad abuukaatooyinka ah .....	30
Abuukaate (ku talaga Medicaid SSI oo kaliya).....	30
State of Wisconsin HMO barnaamijka cadaadla ilaaliyaasha.....	30
<b>Gudbinta ashkatooyinka, cabasho iyo racfaanka .....</b>	<b>31</b>
Ashkatooyinka iyo cabashooyinka .....	31
Racfaannada .....	31
Assshkatooyinnka iyo racfaannada dadajisan .....	32
Gubinta ashkatada ama racfaanka ka baxsan Anthem .....	33

Ashtakooyinka Xuquuqda muwaadinnimada.....	34
<b>Teknoloojiayda cusub and daawaynta .....</b>	<b>35</b>
<b>Xuquuqdaada iyo mas'uulayadhaaga .....</b>	<b>35</b>
Ka war haynta barnaamijka dhiirigalinta takhtarka iyo barnaamijka tayo xoojinta.....	35
Inaad ka war haysid shahaadadha takhtarka .....	36
Qorshe hore, dardaaran ama wakaalad xagga daryeelka caafimaad .....	36
Xaqqa aad u leedahay xogahaaga caafimaad ee diiwaangashan .....	37
Diiditaannu ku xidhan akhlaaqda iyo diinta.....	37
Xuquudaada xubinnimo .....	37
Mas'uuliyaaddada xubin ahaan .....	38
Siyaa sadda sirnimada .....	38
Ogaysiiska maamulka adeegsiga.....	39
Sheegidda xubinka ama takhtarka qish, baabiin ama si xun u adeegsi sameeya. ....	39
Xuquuqdaada ee muwaadinnimada.....	40
<b>Qeexitaanno.....</b>	<b>40</b>
<b>Ogeysiiska HIPAA ee ku saabsan dhaqan galka gaarka ah .....</b>	<b>45</b>

# Bilawga

---

## Bedelidda xogtaada xidhiidhka

**haddii degaankaagu ama lambarka telefoonkaagu isbedelo, markiiba ogeysii wakaaladda kobcinta Dakhliga (IM) ee degmadaada.** Waxaynu u baahanahay maclumaadkan si aynu kuugu sheegno arrimo muhiim ah oo ku saabsan maclumaadka qorshaha. Sidoo kale waa inaad u sheegtaa wakaaladda kobcinta Dakhliga (IM) ee degmadaada iyo Anthem wixii isbedello ah ee muhiimka ah xagga noloshaada, sid guurka ama dhalashada ilmo cusub, si aanu u hubsanno inaad heshid adeegyada aad xaqaa u leedahay.

Waxaa jira dhowr arrimood oo aad arintaan u samayn kartid:

- **Interntka**
  - Gal boggaan internetka ah ACCESS.wi.gov.
  - gal xisaabtaada ee MyACCESS ama samyeso xisaabtaada adigoo dooranaya **Create an Account (Samyeso xisaabtaada)** ka dibna talaaboyinka raac.
- **Telefoon ahaan ama fool-ka-fool**
  - wac ama booqo wakaaladda kobcinta Dakhliga ee IM . (si aad u heshid wakaaladda kobcinta Dakhliga IM, wac lambarkan **1-800-362-3002** ama bogga internetkan gal [dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency](http://dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency).

Xagga xubnaha hela adeegyada SSI: Usoo sheeg isbeddelada xafiiska Dammaanada Bulshada ee ku yaala deegaankaaga. Xafiiska degmadaada ku yaal waxaad ku heli kartaa wicidda lambarkan **1-800-772-1213 (TTY 1-800-325-0778)** oo shaqaynaya marka laga bilaabo 7 a.m. ilaa 7 p.m. maalmaha shaqada ama adigoo booqanya boggan [www.ssa.gov](http://www.ssa.gov).

## Haddii aad guurtid

Haddii aad ku talo jirtid in aad guurtid, la xiriir wakaaladdaada IM ee hadda. **Haddii aad u guurtid** degmo kale, waan inaad sidoo kale la xidhiidhaa wakaaladda kobcinta Dakhliga IM ee degmada cusub, si aad ugu wargelisid isbedelka iyo inaad xaq u leedahay adeegyada BadgerCare Plus ama Medicaid SSI. Waxaad ku heli kartaa wakaaladdaada degaanka ee IM adiga oo wacaya **1-800-362-3002** ama galaya [dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency](http://dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency).

haddii aad u guurtid degmoyinka aan laga helayn Anthem's service area, waxaad wacdaa lambarka adeegaha diiwaangeinta HMO oo ah:

**1-800-291-2002.** adeegaha diiwaangeinta HMO waxa uu kugu caawinayaainaad heshid adeega HMO oo cusub oo laga helo degmadaada.

## **Qiimaynta Daryeelka/Cabirka daryeelka caafimaad ee loo baahanayahay**

xagga xubnaha hela adeegga SSI: Xubin ahaan kamida Anthem, waxa lagaa codsandoonaa inaad kala hadashid shaqaale taababaran caafimaadakaaga iyo daryeelka ad u baahanthay iyo sooyaalkaaga caaimaad. Waxaa lugula soo xidhiidhi 60 cisho gudohood markaad noqotid xubin kamida Anthem si loo qorsheeyo ballanta wada hadalka. Aad ayay muhiim u tahay in aad nala hadashid si aynu kuugu caawino in aad heshid adeegyada iyo daryeelka aad u baahan tahay. Haddii waxa waydiimo aad leedahay ama aad doonaysid si toos ah inaad ula xidhiidhid Anthem si loo qorsheeyo ballan aad kawada hadashaan baahiyooynkaaga xagga daryeelka caafimaad, fadlan wac lambarka Adeegyada Xubnaha ee **1-855-690-7800 (TTY 711)**.

xagga xubnaha hela adeegga BadgerCare Plus ee ah qaangaadh caruur lahayn: Wuxaan boostada ku heli doontaa su'aalo caafimaad oo gaaban. Fadlan isku day inta aad awoodid si aad u buuxisid foomkaasi kuna soo dir bokhshada shabadaysan ee su'aalaha lala soo diray. Haddii aad u baahatid caawimaad xaga buux-buuxinta su'aalah, fadlan wac lambarkan **1-855-690-7800 (TTY 711)**. Waxa suurtgal ah in lagu soo waco sia aad telefoon ahaan ugu buuxisid su'aalah.

Su'aalahaan waa kuwo aad muhiim u ah. Waxayn noo sheegaysaa maclumaadka aynu u baahanahay si aynu kuugu caawino in aad heshid daryeelka aad u baahan tahay. Haddii aad segtid wicitaanka telefoonka iyo boostada, tani macnaheedu waxay tahay in aynaan awoodin in aynu kula soo xiriirno. Fadlan naga soo wac lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711) si aad noogu sheegtid in aadan helin xogururinta caafimaadka ku saabsan. Cosboonaysii siyaabaha lagaaga soo xidhiidhi lahaa si shakhsii ah, ama adiga oo wacaya wakaaladda kobcinta dakhiga IM ama adiga oo adeegsaanaya bart internet-ka ee [access.wisconsin.gov](http://access.wisconsin.gov).


## **Isticmaalkaa kaararkaaga aqoonsiga**

Wuxaan isticmaali doontaa Anthem iyo ForwardHealth kaararkaaga aqoonsiga ee xubininmada is aad u heshid adeegyadaada ee BadgerCare Plus and/or Medicaid SSI. Haddii aadan weli haysanin mid ama dhammaan kaararkaaga aqoonsiga, waxaad si dhakhso ah ugu heli doontaa boostada. Kaararkaaga aqoonsiga ee ForwardHealth waxa uu ka giddisanyahay Kaararkaaga aqoonsiga ee Anthem. Marwalba wado dhammaan kaararkaaga aqoonsiga, tusina marwalba oo aad aadid takhtarka ama cusbitaalka. Karkaaga ForwardHealth ID waxa ah in la muujiyo si loo buuxiyo rijeetada iyo adeeg kasta oo uu gobolku bixiyo (**eeg qaybta adeegyada Gobolka**). soo wada qaado kaar aqoonsikasta oo caymisyadaad ku saabsan markaa u tagaysid dhakhtarka, cisbitaalka ama farmashiiyaha. Waxaan kamida Kaararkaaga aqoonsiga ee Anthem ama jih kasta oo aeegaas bixisa. waxaa suurtgal ah inaad dhibaatooyin ka la kulmi kartaa helitaanka adeegyada caafimaad ama rijeetooyinka haddii aanaad sidanin Kaararkaaga aqoonsigas.

Tusaalaha Kaararkaaga aqoonsiga xubinnamada ForwardHealth:



Tusaalaha kaarka aqoonsiga xubinka Anthem:



Kaararkaaga aqoonsiga xubinnimada ee Anthem member waxa uu muujinayaa:

- Magaca iyo lambarka telefoonka bixiyaha daryeelkaaga aasaasiga ah (PCP).
- Lambarkaaga Aqoonsiga Anthem.
- Lambarkaaga Aqoonsiga Medicaid.
- Lambaro telefoon muhiim ah haddii aad qabtid su'aalo dheefo ama u baahan tahay caawimaad laguugu caawiyo helida takhtar ama xarun caafimaad.

Haddii Kaararkaaga aqoonsiga ee Anthem uu lumo ama lagaa xado, markiiba nagala soo xidhiidh lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711). Waxaan kuu soo diri doonaa mid cusub.

Kaararkaaga aqoonsiga ee ForwardHealth uu lumo ama lagaa xado, wuxaad la xidhiidhaa diwaangaliyaha oo lambarkiisu yahay 1-800-362-3002.

## Bogga internetka ee xubinka Anthem

Si aad u ogaatid daryeelka iyo adeegyada ee laguu diyaariyay wuxaad booqataa bogga internetka ee xubnaha oo ah [www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin). Halkan, sidoo kale wuxaad ka heli doontaa:

- Qalabka raadinta Takhtarka iyo daliilada bixiyaha adeegga.
- Macluumaaad ku saabsan sida dib loogu cusboonaysiyo dheefahaaga.
- Tilmaamaha ka hortagga caafimaadka.
- Khayraadka bulshada.

- Buug-yaraha xubinka (asaga oo eliktaroonig ah si ay kuugu fududaato raadinta ereyga).

Isku diiwaangeli gelid ammaan ah, waxaadna sidoo kale:

- Waxaad daabacataa Kaararkaaga aqoonsiga ee xubinka Anthem.
- Eegi kartaa dheefahaaga.
- Adeegyada Xiriirka Xubinka.

Si aad isugu diiwaangelisid gelid ammaan ah:

- gal [www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin) oo dooro **Login**.
- dooro **Register** taabo, and oo gali:
  - Lambarka kaarkaga ee xubinnimada— lambarku wixa uu ka bilaabmaa ZRA, wixa ku xiga sagaal lamabr oo ah lambarka aqoonsiga Anthem, (wixa uu ku yaallaa Kaararkaaga aqoonsiga).
  - Magaca dambe, taariikhda dhallashada iyo sumadda degaanka.

## Adeega mobilka Anthem Medicaid

Lasoo dag si bilaash ah Adeega Mobilka Anthem Medicaid oo loogu talagalay telefoonada casriga ah. Waxed awood u yeelanaysaa:

- Inaadd si fudud oo aamina ah u gasho adigoo adeegsanaya fartaada si aqiinsi ahaana Log in easily and securely with Touch ID.
- Helidda takhtar, cisbitaal, farmashiiye, ama farsamo yaqaan adeegga kuu qirshaysan kuu qabta raadinta oo aad ku dayi magaaada, Gobolka, iyo farsamada.
- Shaqaalaha tus Kaararkaaga aqoonsiga Anthem ee xubinnimada.
- Baadh cilladaha aad dareemaysid adigoo adeegsanaya fasameyaqaanka ku shaqo leh.
- Email ahaan ama faks ahaan ugu dir your Kaararkaaga aqoonsiga takhtarkaaga, farmashiiyaha ama adeegbixiyaasha kale.

Si aad xog dheeriya u heshid Adeega Mobilka Anthem Medicaid booqo [www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin).

## Doorashada adeeg bixiyaha gudd

Xubnaha cusub ee ku soo biira Anthem waa lasoo wacaya si loo soo dhaweyyo marka ay ku soo biiraan adeeggan. Inta lagu guda jiro wicitaanka, waxaa lagu weydiin doonaa haddii aad qabtid bixiye daryeel aasaasi ah (PCP). Bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP) waa takhtarka ama daryeel bixiyaha aasaasiga ah ee aad ugu tagtid baahiyada daryeelka caafimaadka. Haka wel-welin — waxaan kugu caawin doonaa in aad dooratid bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP) haddii aadan mid haysanin. Haddii aadan war naga helin saddex illaa afar todobaad gudahooda kadib markaad noqotid xubin, taasi macnaheedu waxay tahay in aanan awoodin in aynu kula soo xiriirno. Fadlan ka wac Adeegyada Xubinka lambarkaan telefoonka lacag la'aanta ah 1-855-690-7800 (TTY 711) si aad u heshid caawimaad laguugu caawiyo doorashada takhtar adiga kugu habboon.

waxaa muhiim ah inaad ddoratid PCP si uu u maamulo daryeelkaaga caafimaad oo dhan. PCP-ga waxaad ka doorankartaa liiskatakhaatiirta qoranya bukan qabyaal cusub. waxaanay ku calaamadaysanyihiin hagaha adeegbixiyaasha Anthem. Daliilka bixiyaha daryeelka sidoo kale waxaa ku qoran luuqadaha aan-ahayn Ingiriiska kuwaas oo ay ku hadlaan takhtaradeenna. Takhtaradeennu waa kuwo u nugul baahiyada dhaqamo badan. Si aad u dooratid bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP), ka wac Adeegyada Xubinka lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711).

Marka aad u baahan tahay daryeel, waa muhiim in aad waclid marka hore bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP). Bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) wuxuu kugu caawin doonaa in aad go'aansatid haddii aad u baahan tahay in aad la kulantid takhtar ama takhasusle iyo, haddii ay munaasab tahay, wuxuu ku siinayaa wareejin. Sidoo kale, haweenaydu waxay u tegi karaan takhtarka ku takhasusa caafimaadka haweenayda, such as an sida takhtarka dhallaanka ama taranka, neres umulisa ah, ama umuliso, iyada oon u baahnayan in uu PCP-gu wareejiyo.

### ***Qodob muhiim ah***

Qaar ka mid ah cusbitaalada iyo takhtarada waxaa dhici karta in aysan siinin xubnaha hal ama ka badan oo adeegyadaan ceymiska ku jira ah:

1. Adeegyada qorsheynta qoyska
2. Adeegyada xakamaynta dhallida (waxaa ka mid ah xakamayn dhallid deg-deg ah)
3. Joojinta dhalmada (waxaa ka mid ah in tuubad lagu xiro wakhtiga dhallida iyo umusha)
4. Ilmo iska soo ridida (doorashada lagu dhammaynayo uurka)

La sii hadal takhtarka, xananada ama cisbitaalka aad qorshaynasid inaad adeegsato, oo hubi inuu bixyo adeegyada aad u baahantahay oo dhan.

## **Bedelidda bixiyaha guud ee daryeelka**

Inta badan, waxaa wanaagsan in aad haysatid isla bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP) si asaga/ayada u oggaadaan baahiyadaada caafimaadka kuuguna caawiyaan in aad heshid daryeelka aad u baahan tahay. Si kastaba, waxaan kaa doonaynaa in aad ahaatid qof ku faraxsan bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP). Haddii aad doontid inaad bedeshid PCP-ga, isticmaal adeega doondoonaista takhtarka [www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin) si aad u heshid PCP-ga buuxin kara baahiyahaaga. kadib, gal xisaabtaada si aad uga bedeshid PCP-gaag boggaa intertent-ka. Sidoo kale waxaad wici kartaa Anthem Adeegyada Xubnaha lamabrkooda oo bilaash ah 1-855-690-7800 (TTY 711) haddii aad u baahantahay caawimaad xagga doorashada ama bedelidda PCP-ga. Haddii aad dooranaysid PCP, waa inaad doorata PCP-ga qoranya bukaan qabayaal cusub. Haddii aad codsatid bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP) midkaas oo aanan qaadanaynin bukaano cusub, waxaan kuu sheegi doonaa oona kaa codsan doonaa in aad samaysid doorasho kale.

## **Miyi dage (HMO kaliya oo degmadau leedahay)**

Haddii aad miyi degentahay oo HMO kaliya leh, oo aanu takhtarka ah adeegaha guud ee daryeelkaaga caafimaad kamid ahayn kuwa adeega Anthem bixiya, waxaa kuu suurtagal ah inaad sii adeegsatid ilaa 60 casho. Fadlan la hadal Anthem marka ugu horeeysa ee aad is deewaan galisid si aanu u ogaanno daryeel bixiyahaagu waa kuma. Haddii daryelahaasi aanu noqonin

kamid shabakadda Anthem 60 casho kadib, waxaa lagu siinaya liiska ka qaybgalyaasheena si aad oga dooratid.

## **Helidda daryeelka ad u baahantahay**

---

### **Daryeelka degdega ah**

Daryeelka xaalada deg-degga ah waa daryeelka isla markaasi loo baahan yahay. Tusaalooyinka qaar waxaa ka mid ah:

- Ku saxasho
- Qallal
- Qalal muddo dheer ama soo noq-noqda
- Lafo jab halis ah
- Gubasho halis ah
- Xanuun aad u daran
- Dhiig bixid daran ama aan caadi ahayn
- Wadno xanuun laga shakiyay
- Sumoowid laga shakiyay
- Maskax xanuun laga shakiyay
- Dhibaato neefsashada ah
- Miyir daboolmid

**Haddii aad u baahantahay daryeel degdeg ah, oo xalaadda aad ku suganthay aanay sugi karin, is ku day inaad tegtid cisbitaallada Anthem si laguu gargaaro. Haddii xaladda degdega ah aad ku sugantahay ay halis tahay oo aanad awoodin in aad gaadhid cisbitaalka ugu dhaw, garaac 911 ama booliska degmada ama qaybta adeegyada degdega ah.**

Haddii aad ka frisanwaydid inaad cisbitaal ama takhtar aan ahayn kuwa -Anthem, wac lamabarka Adeegyada Xubnaha ee Anthem oo ah: 1-855-690-7800 (TTY 711) sida ugu dhakhsiyaha badan ee aad u awoodid si aad noogu sheegtid waxa dhacay oona kuugu caawino in aad heshid daryeelka la-socoshada.

**xasuusu, qolalka degdega ee cisbitaalladu waxa loogu talagalay xaaladaha dhab ahaan degdega u ah oo kaliya. Haddii aad xaalad degdeg ah oo dhab ah, wac takhtarkaaga ama lambarkeena 24/7 NurseLine ee 1-855-690-7800 (TTY 711) ama xarunta adeega xaaladaha adag, intaanaad tegin qaybta xaaladaha degdega ah. Waxa kaloo lagaa rabaa inaad wacdo takhtarkaaga ama lamabarkeena 24/7 NurseLine haddii aanaad sheegi karin in bukaankaagu ama dhaawacaagu yahay mid degdeg ah. Wuxaan kuu sheegi doonna goobta aad daryeelka ka heli kartid.**

Haddii aad daryeel ku qaadatid xarun-ka-baxsan-qorshaheena, waxaa lagu weydiin karaa in aad u wareegtid xarun qorshaha ku jirta haddii aanan midaasi dhibaato u gaysanaynin caafimaadkaaga.

### **Daryeelka dhakhsaha ah**

Daryeelka dhakhsaha ah waa daryeel aad ugu baahanthay si uga dhakhsa badan booqashada takhtarka ee caadiga ah **mana ahaa** daryeelka degdegga ah.

Tusaalooyinka qaar waxaa ka mid ah:

- Nabaro
- Gubasho yar
- Dhaawacyo yar
- Ficil celino daawo badan
- Dhiig bixid aanan darnayn
- Murgacasho

- Lafo jab baddan

Waxaa kugu waajiba ah inaad ka heshid daryeelka dhakhsaha ah takhaatiirta Anthem haddii aanad horraan u hekin ogolaashiyehiina anaad booqatid Takhtar kabaxsan qorsheheena. Ha u aadin qolka xaalada deg-degga ah ee cusbitaalka daryeelka deg-degga ah aan ka ahayn haddii aad marka hore naga heshid oggolaansho.

Haddii aad u baahan tahay daryeelka deg-degga ah, wac bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) haddii ay tahay inta lagu guda jiro saacadaha xarunta caafimaadka caadiga ah. Saacadaha shaqada kadib iyo fasaxyada, wac lambarkeena 24/7 NurseLine ee 1-855-690-7800 (TTY 711). Wuxaan sidoo kale heli kartaa liiska xarumaha Anthem ee u diyaarsan daryeelka dhakhsaha ah oo ku jira haga adeeg bixiyaasha. Wuxaan isticmaali kartaana adeegga hel takhtar Find a Doctor (hel dhakhtar) oo online ah kuna yaalla boggan [www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin). Inta badan, xarumaha caafimaadka ee daryeelka deg-degga ah waxay sii dheereeyaan saacadaha todobaadka ama fiidka, balse midaan waa mid ay ku kala duwanaan doonaan xarumaha caafimaadka. Fadlan u wac si toos ah xarunta caafimaadka ama booqo boggooda internetka si aad u oggaatid saacadaha-cusub-ee shaqada.

Ikhtiyar kalena waa jiraa xagga daryeelka oo ah xanaano degdeg ah, ama MinuteClinic® oo laga heli karo farmashiiyaha iyo bakhaarrada. Marka uu daryeelahaaga PCP-ga aan la heli karin, wuxaan adeegsan kartaa xanaanooyinka “ciyaadadaha” bilaa ballanta ah, si aad uga heshid daryeelka bukaanka aan halista ahayn iyo nabarrada, ama baahiyoooyinka cudur ka hortagga aha sida tallaalada. Wuxaan isticmaashaa adeegga hel takhtar Find a Doctor (hel dhakhtar) ee internka si aad u heshid farmashiiye ama bakhaar leh xanaano “ciyaadad”.

## **Daryeelkaaga markaa aad dhoofsantahay**

Raac xeerarkan haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad balse aad uga fogtahay guriga si aad u aadid bixiyahaaga daryeelka aasaasiga joogtada ah:

- Wixii ku saabsan xaaladaha caafimaadka deg-degga ah, aad cusbitaalka kuugu dhow, xarunta caafimaadka ama bixiyaha daryeelka. Ka wac Adeegyada Xubinka lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711) sida ugu dhakhsiyaha badan ee aad u awoodid si aad noogu sheegtid waxa dhacay oona kuugu caawino in aad heshid daryeelka la-socoshada.
- Wixii ku saabsan daryeelka deg-degga ah ama caadiga ah ee ka fog guriga, wuxaad u baahan tahay in aad oggolaansho naga heshid ka hor inta aadan aadin takhtar, xarun ama cussbitaal kale. Midaan waxaa ka mid ah carruurta wakhtigooda ku qaadanaya meel ka fog guriga ayaga oo uu la socdo waalidkooda ama qof qaraabadooda ah. Naga soo wac lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711) si aad u heshid oggolaansho aad ku aadid takhtar, xarun caafimaad ama cussbitaal kale.

# **goormaalugu soo dallacayaa biilka adeegayada**

---

## **ceymisan iyo kuwa aan cwymisnay**

BadgerCare Plus, ahaan kuma kallifnid inaad ku bixisid adeegyadaas aan dhaafsanay wada bixinta lagaa rabo (copays). Lacagta wada bixintaada ma ahaan karto wax ka badan waxa ay tahay in ay ahaato adeegga-lacag-la'aanta ah. Waa inaad booqtaa takhtar ka mid ah ceymiska Anthem si aan luguugu soo dallacin biil ku saabsan adeegyada aad xaqqa u leedahay. Ka reebitaanada kaliya waa xaaladaha caafimaadka deg-degga ah. Haddii aad jeceshahay in aad aqbashid mas'uuliyada maaliyadeed una dirtid qorshe lacag bixin qoran takhtarkaaga, waxaad codsan kartaa adeegyada aanan ahayn qayb kamid ah dheefahaaga. Takhaatiirtu waxay kugu soo dallaci karaan biil aan dhaafsanayn kharshka daryeelkooda caadiga ah, haddii ceymisku aanuu daboolayn adeegooda.

Haddii aad heshid biil lacag ah oo loogu talogalay adeega aadan oggolayn, fadlan ka wac Adeegyada Xubinka lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711).

## **La bixinnada**

Waxa suurto gal ah in BadgerCare Plus, Anthem iyo adeegyasheeda iyo shirkadaha hawlwadayaasha u ah inay kugu soo dallacaan biil kooban oo ah kharshka khidmadda, waxaana la idhaahdaa la bixin (copays). Xubnahaan soo socda ma ahan in lagu bixiyo lacagta wada bixinta:

- Medicaid SSI xubnaha
- Deganayaasha guriga kalkaalinta
- Dumarka uurka leh
- Xubnaha ka yar 19 sanno jir kuwaas oo ah xubnaha qabiil si federaal ama dowlad ahaan loo aqoonsaday
- Xubnaha ka yar 19 sanno jir kuwaas oo haysta dakhliyo ah ama ka hooseeya boqolkiiiba 100 heerka saboolnimada federaalka ama dowlada

## **Daryeelka caafimaad ee laga helay debedda Wisconsin**

bixiyaasha daryeelka caafimaad ee goobaaha aad u dhooftay way kuu adeegi karaan oo ay biilka ku soo dallici karaan Anthem taas oo ah haddii aad ka baxsanyad Wisconsin oo aad u baahatay daryeel caafimaad oo degdeg ah. waxaad yeelankartaa kharash wada bixin ah oo ay sababaan adeeg caafimaad oo degdeg ah oo laguugu fidiyay gobolka Wisconsin debeddi.

Adeegyada lagu qaato meel ka baxsan Waddanka United States, Canada iyo Mexico ma ahan kuwo la ceymiyay. Haddii aad u baahatid adeegyada xaalada caafimaadka deg-degga ah inta aad joogtid Canada ama Mexico, kaliya takhtaro iyo cusbitaalo khaas ah ayaa ku siin kara adeegyada la ceymiyay. Fadlan wac Adeegyada Xubinka haddii aad qorshaysatid in aad u safartid mid kamid ah waddamadaan oona jeceshahay in aad heshid macluumaa dheeraad ah. Sidoo kale, nasoo wac haddii aad ku heshid adeegyada xaalada caafimaadka deg-degga ah meel ka baxsan Waddanka United States.

Haddii lagugu soo dallaco biil adeeg, waxaad wacdaa lambarka Adeegyada Xubnaha ee Anthem oo ah 1-855-690-7800 (TTY 711) markiiba.

## Ceymisyada kale

Haddii aad haysatid ceymisyo kale oo dheeraad ku ah Anthem, waa inaad ka war gelisaa takhtarkaa ama daryeel bixiyaasha kale. Haddii takhtaarkaaga ee Anthem ama bixiyaasha daryeelka caafimaad ee kale aqbali waayaan ceymiskaaga kale, waxaad la xidhiidhaa adeegaha diiwaangalinta HMO lamabriisa oo ah 1-800-291-2002. Takhasuslaha Isqorida HMO wuxuu kuu sheegi karaa sida loo isticmaalo dhammaan qorshooyinka ceymiska. Waa muhiim in la tusiyo ama muujiyo dhammaan kaararkaaga ceymiska caafimaadka marka aad qaadatid daryeelka. Kaana waxa ka mid ah kaararka Anthem, ForwardHealth and kaararkaaga aqoonsiga ee ceymisyadaada kale. Midaan waxay kuu oggolaan doontaa in aad sida ugu fiican uga faa'ideysatid dheefahaaga.

Fadlan waxaad la hadashaa sidoo kale lambarka Adeegyada Xubnaha ee Anthem oo ah 1-855-690-7800 (TTY 711) haddii aad haysatid ceymis kale oo caafimaadka ku saabsan, ama ceymisyadaada kale ay kaa dhacayaan.

## Ceymiskan iyo gobolka adeegyadooda

---

Anthem waxay qabtaa adeegyada qaar, gobolkuna waxa uu qabaa qaar kale. Waxaad Ka helaysaa Labada jadwal ee hoose waxyaabaha aad ka helaysid Anthem iyo kuwa kale uu gobolko qabo.

Waxaan doonaynaa in aynu kugu caawino in aad heshid daryeelka adiga kugu munaasabka ah. Qorshahaaga wuxuu ceyminayaa dhammaan adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah kuwaas oo uu bixiyo takhtarka qorshaha. Haddii bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) uu rumeynsanyahay in ay khasab kugu tahay in aad aragtid takhtar kabaxsan-qorshaha, waxay wici karaan Adeegyada Xubinka si aad uga codsatid oggolaansho.

Kaliya adeego khaas ah ayaa ku jira lacagta wada bixinta. In baddana kuma jiraan. Lacagaha wada bixinta waxaa lagu qoray jadwalada. Xubnaha qaar oo kaliya ayaay tahay inay dhiibaan kharshka wada bixinta ah, (eeg qaybta *Copayments*).

Jadwalladani waa soo koobid uun. Buug-yarahaan waxaa ku qoran faah-faahino badan oo ku saabsan dheefahaaga. naga soo wac 1-855-690-7800 (TTY 711) (ForwardHealth ee gobolka Adeegyada Xubnaha) lamabrikooda oo ah 1-800-362-3002 haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan adeegyadan.

## Anthem dheefaha

adeegyada	awooda
<b>Xarumaha qalliinnada degdega ah</b>	Nidaamyo qaliin khaas ah iyo adeego sheybaar la xiriira ayaan la ceymiyay.
<b>Ilkaha</b>	Waxaa loo ceymiyay xubnaha ku nool Kenosha, Milwaukee, Ozaukee, Racine, Washington iyo Waukesha.

<b>adeegyada</b>	<b>awooda</b>
<b>Bixiyaasha qalabka hal-mar isticmaalka ah (DMS)</b>	waa La ceymiyay
<b>Qalabka caafimaad ee waara (DME)</b>	waa La ceymiyay
<b>Cudurka kelyaha oo heer-kama dambays ah (ESRD)</b>	waa La ceymiyay
<b>Baadhitaanada caafimaad ee caruurta</b>	HealthCheck baadhitaanada iyo adeegayada kala duwan ee dadka ka yar 21-ku waa La ceymiyay.
<b>Adeegyada maqalka</b>	waa La ceymiyay
<b>Adeegyada daryeelka guriyeed</b>  (Caafimaadka guriga, daryeelka shakhsiyeed iyo waajibka kalkaalinta khaaska ah)	waa La ceymiyay
<b>Daryeelka guryaha isxaanta</b>	waa La ceymiyay
<b>Adeegyada bukaanka cisbitaalka la jiifiyo</b>	waa La ceymiyay.
<b>Caafimaadka dhimirka iyo ka daaweynta isticmaalka maandooriyaasha</b>	waa La ceymiyay
<b>Adeegyada guryha xanaanaynta</b>	waa La ceymiyay
<b>Adeegyada bukaanka ciyaadadaha</b>	waa La ceymiyay
<b>ciyaadadaha cisbitaalka—qolka xaaladaha degdega</b>	waa La ceymiyay
<b>Daaweynta dabiiiciga ah, daaweynta xirfadeed, hadalka iyo cudurada dhawaaqa.</b>	waa La ceymiyay

<b>adeegyada</b>	<b>awooda</b>
<b>Adeegyada takhtarka</b>	waa La ceymiyay; oo uu ku jiro shatbaadhku iyo raadyolojigu.
<b>Cudurrada cagaha</b>	waa La ceymiyay
<b>Daryeelka uurka/dhalitaanka</b>	waa La ceymiyay; oo ay ku jirto la socodka hooyada uurka leh, ka hortaga cudurada dhimirka iyo baadhista asdiigsiga maandorayaasha iyo daryeelka dumarka khtarta ugu jira cudurada dhimirka iyo dhibaatooyinka adeegsiga maandooryaasha.
<b>Adeega caafimaadka taranka — adeegyada qorshaynta qoyska</b>	waa La ceymiyay; oo ay ka baxsantahay daawaynta madhalaysnimada, adeegyada uurka la amaanaysto, sidoo kale oo aany ku koobnayn uurku abuurka gacmeed iyo ka umulinta natiijo u ah, oo aan ceymiska kamid ahayn, iyo raad biinta is dhufaamidda.
<b>Daryeelka indhaha ee caadiga ah</b>	waa La ceymiyay; ookyaaluhuna ku jiro.
<b>gaadiidka (degdegga)</b>	waa La ceymiyay.

## **faaidooyinka caymis gobolka**

<b>Behavioral (autism) treatment services</b>	Ceymis ku jirid buuxda oo ku saabsan diirad saarida adeegyada daaweynta hab-dhaqanka (ay la socoto oggolaansho hore)
<b>Toosinta laf dhabarka</b>	waa La ceymiyay.  \$0.50 illaa \$3 lacag wada bixin adeeg kasta ah.
<b>Ilkaha</b>	Waxaa loo ceymiyay xubnaha aanan ku noolayn Kenosha, Milwaukee, Ozaukee, Racine, Washington iyo Waukesha.  \$0.50 illaa \$3 lacag wada bixin adeeg kasta ah.
<b>daawooyinka (rajeetooyinka)</b>	Dheefta daawada buuxda ee uu la jiro ceymiska guud ahaan daawooyinka wata qoraal takhtar iyo magaca-shirkada iyo qaar

	<p>ka mid ah daawooyinka la soo iibsado ayaga-oo aan wadan qoraal takhtar (OTC). Xubnuhu waxay ku xadidan yihiin shan qoraal daawo oo bil kasta ah kuwaas oo loogu talogalay daawooyinka opioid-ka.</p> <p>Wada bixinta lacagtu waa sidaan soo socoto:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• \$0.50 ee loogu talogalay daawooyinka OTC.</li> <li>• \$1 ee loogu talogalay daawooyinka guud.</li> <li>• \$3 ee loogu talogalay daawooyinka wata magaca-shirkada.</li> </ul> <p>Wada bixinta lacagtu waa mid ku xaddidan \$12 xubin kasta, bixiye daryeel kasta, bil kasta. Daawooyinka OTC waxaa laga saarayaa ugu badnaan tiradaan \$12.</p>
<b>gadiidka (aan degdeg ahayn) — cambalaaska, gaadiidka hawlaха caafimaad u gaар ah (SMV), gaadiidka caadiga ah</b>	<p>Gaadiidka caafimaadka xaalaada caafimaadka aan deg-degga ahayn midkaas oo uu bixiyo daryeel bixiye shahaado haysta midaas oona loogu talogalay adeegga la ceymiyay.</p> <p>Wada bixinta lacagtu waa sidaan soo socoto:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• \$2 wada bixinta lacagta ah midaas oo loogu talogalay safarada ambalaasta xaalada caafimaadka aan deg-degga ahayn.</li> <li>• \$1 wada bixinta lacagta safar kasta ee loogu talogalay gaadiidka baabuur caafimaad khaas ah.</li> </ul> <p>Ma jirto wada bixin lacag loogu talogalay gaadiidka qaade guud ama ambalaas xaalad caafimaad deg-deg ah.</p>

## Ogolaanshaha hor dhac ah

adeegyada qaarkood waxay u baahanyihiin ogolaansho hor dhac ah oo laga helo Anthem iyo/ama takhtarkaaga. Takhtarkaaga waa in uu adiga kuu weydiyyaa oggolaanshaha. Midaasi waa qayb ka mid ah sababta ay muhiim u tahay in aad marka hore aragtid bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) wixii ku saabsan arrimaha caafimaadka kuwaas oo aan ahayn xaalado caafimaad aan deg-deg ahayn iyo booqashooyinka-ficnaanshaha sannadlahaa ah.

Takhtarkaaga waxaa khasab ku noqon karta in uu nala shaqeeyo si aynu u bixino oggolaanshaha loogu talogalay adeegyada daryeelka caafimaadka khaaska ah. Waxaynu kusalaynaa go'aankeena labbo shay:

- Waxa ay yihiin dheefaha daryeelka caafimaadka aad haysatid

- Haddii daryeelka uu yahay mid caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah

Ma siino abaal marin takhtarada ama shaqaalayaasha daryeel ee kale kuwaas oo gaara go'aanada loogu talogalay:

- Diidista daryeelkaaga.
- Dhihida in aadan haysanin dheefo.
- In lagu siiyo daryeel ka yar imidka aad u baahan tahay.

Xusuusnoow: Oggolaanshaha hore ee loogu talogalay adeegga aanan la ceyminin ma dammaana qaadayo lacag bixinta loogu talogalay adeegaasi. Fadlan naga soo wac lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711):

- Haddii aadan hubin in aad nooga baahan tahay anaga oggolaansho.
- Wixii ku saabsan faah-faahinada khuseeya sida lagu helo oggolaansho.
- Si aad u fiirisid xaalada oggolaanshahaaga.

## **Tilmaamta faa'idooyinka**

### **Caafimaadka dhimirka iyo and adeegsiga maandoorayaasha dheefaha**

Mararka qaar, la-tacaalida dhammaan hawlahu guriga iyo qoyska waxay u horseedi karaan wel-wel. Wel-welkana wuxuu horseedi karaa:

- Murugo
- Walaac
- Dhibaatooyin guur, qoys iyo/ama waalidnimo
- Xad gudub daroogo iyo khamro

Haddii adiga ama xubin ka tirsan qoyska uu qabbo mid ka mid ah dhibaatooyinkan, waxaad heli kartaa caawimaad. Wac lambarka Adeegyada Xubnaha ee Anthem oo ah 1-855-690-7800 (TTY 711). Sidoo kale waxaad heli kartaa magaca takhasuslaha caafimaadka hab-dhaqanka midkaas oo ku arki doona haddii aad mid u baahatid. Adeegyada uu Anthem bixiyaa oo dhan waa gaar.

Dheefahaaga waxaa ka mid ah in badan oo ah adeegyada caafimaad ahaan loo baahan yahay, sida:

- Daryeelka caafimaadka maskaxda ee bukaan-jiifka
- Daryeelka caafimaadka maskaxda ee bukaan-socodka iyo/ama ku xad gudubka daroogada
- Cusbitaal dhigid qayb ah
- Adeegyada daaweynta baxnaaniska caafimaadka maskaxda

Adigu uma baahnid wareejin uu ku wareejiyo bixiyaahaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) si aad u qaadatid adeegyadan ama in aad aragtid takhasusle caafimaad hab-dhaqan ku jira shabakadaada.

Haddii aad u malaysid in takhasuslaha caafimaadka hab-dhaqanka uusan ka soo bixin baahiyada, la hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka (PCP). Asaga ama ayada ayaa kugu caawin kara in aad heshid takhasusle kale.

Waxa jira daawooyin iyo adeegyo oo uu bixiyo PCP-kaagu ama takhtarka caafimaadka hab-dhaqanka ah, oo ay waajib ku tahay inay waydiistaan Anthem ogolaansho hordhac ah intaanaad helin. Takhtarkaaga wuxuu awoodi doonaa in uu kuu sheego waxa ay yihiin.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan wareejinada iyo marka aad mid u baahan tahay, kala xiriir Adeegyada Xubinka lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711).

**Haddii aad doonaysid caawimaad degdeg ah, fadlan wac Behavioral khadka degdega ah ee dibaatooyinka caafimaad ee hab-daqanka ah ee lambarkiisu yahay  
1-855-690-7800 (TTY 711).**

### **qorshaha qoyska dheefaha**

Waxaan siinaa adeegyada u qorshaynta qoyska dhammaan xubnaha, ay ku jiraan kuwo yar-yarka ah. Haddii daryeelahaaga caafimaad ee guud aanad doonayan inaad kala hadashid qorshaynta qoyska, markaa nagala xidhiidh lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711). Waxaan kugu caawinayanaa takhtar u gaar ah qorshaha qoyska oo Anthem ka socda, oo ka giddisan daryeelahaaga caafimaad ee guud.

Waxaan kugu dhiiri galinayanaa in aad yeelatid adeega qorshaha qoyska oo aad ka heshid takhtar ka socda Anthem si aanu isgu habeenno daryeelkaaga caafimaad oo dhan. Inkastoo aad tegi kartid xanaanyoynka qorshaynta qoyska ee aqbalaysa Kaararkaaga aqoonsiga ee ForwardHealth, xittaa haddii aanay kamid ahayn qorshaha Anthem.

### **Daryeelka ilkaha**

**Xagga xubnaha dega Kenosha, Milwaukee, Ozaukee, Racine, Washington and Waukesha counties,** Anthem waxay u fidinaysaa adeegyada caafimaadka ilkaha DentaQuest. Waa inaad u tagtaa takhtar ilkaha ah kamida qorshaha Anthem. wac Anthem Adeegyada Xubnaha at 1-855-690-7800 (TTY 711) si ad u heshid magacyada takhaatiiteena ilkaha Ama booqo DentaQuest ee [www.dentaquest.com](http://www.dentaquest.com) ama wac 1-888-271-5210 (TTY 1-800-466-7566).

Adigu oo xubin ka mida Anthem, waxaad xaq u leedhay ballantakhtarka ilakaha 90 casho gudohood markaad dalbatid, adigoo ama qoraal ama telefoon kala xidhiidhaya Adeegyada Xubnaha.

**xubnaha aan degenayn Kenosha, Milwaukee, Ozaukee, Racine, Washington and Waukesha counties,** adeegyada caafimaadka ilkaha waxa ceyminaya gobolka iyadoo la adeegsano BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI. Waad ka heli kartaa daryeelka ilkaha adeege ka diwaangashan Medicaid- oo ogol kaarka aqoonsiga ForwardHealth. Si aad u heshid daryeel fidiye ka diwangashan Medicaid:

1. booqo [www.forwardhealth.wi.gov](http://www.forwardhealth.wi.gov).
2. dooro **Members** ee ku taal badhtamaha bogga.
3. hoos u wad oo dooro **Resources** taabo.
4. dooro **Find a Provider (Hel khidmad bixiye)**.
5. hoosta *Program*, dooro **BadgerCare Plus/Medicaid**.

ama, waxaad wici kartaa lambarka Adeegyada Xubnaha ee ForwardHealth oo ah 1-800-362-3002.

Haddii aad qabtid xaalad caafimaad deg-deg ah, waxaad xaq u leedahay in lagu daaweyo 24 saacadood gudahooda ka-dib codsigaaga. Xaalada caafimaadka ilkaha deg-degga ah waa adeegyo caafimaad ilkaha oo si dhakhso ah loogu baahan yahay si loo daaweyo xanuun daran oo ilkaha ah, barar, qandho, jeermis ama dhaawac ilkaha ah. Haddii aad la kulmaysid xaalad caafimaad deg-deg ah:

- Hadii aad hore u lahayd takhtar ilko ka deewangasan Anthem:
  - Wac xafiiska takhtarka ilkaha.
  - U sheeg xafiiska takhtarka ilkaha in adiga ama ilmahaaga aad qabtiin xaalad caafimaad ilkaha deg-deg ah.
  - U sheeg xafiiska takhtarka waxa ay tahay dhibaatooyinka dhabta ah ee ilkaha. Midaan waxay noqon kartaa wax la mid ah sida ilig xanuun aad u daran ama barar wejiga ah
  - Nasoo wac haddii aad u baahan tahay caawimaad laguugu caawiyo tagida iyo ka soo noqoshada meesha ballanta ilkaha aad ku leedahay.
- Haddii aanaad iminka haysanin dhakhtar ilkaha oo xubin ka ah Anthem:
  - Wac lambarka adeega Xubnaha Anthem. Noo sheeg in adiga ama ilmahaaga aad qabtiin xaalad caafimaad ilkaha deg-deg ah. Wuxaan kugu caawin karnaa in aad heshid adeegyada ilkaha.
  - Noo sheeg haddii aad u baahan tahay caawimaad laguugu caawiyo tagida iyo ka soo noqoshada xafiiska takhtarka ilkaha.

Si lagaaga caawiyo xaaldaha degdega ee ilkaha, waxaad sidoo kale wici kartaa lambarka DentaQuest ee 1-888-271-5210 (TTY 1-800-466-7566) haddii aad ku sugantahay degmooyinka Kenosha, Milwaukee, Ozaukee, Racine, Washington and Waukesha counties.

## **dhayida iy toosinta laf dhabarka Dheefaha**

Adeega toosinta la dhabarku waxa uu ku jiraa ceymiska gobolka ee hoos taga BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI. Adeega toosinta la dhabarku waxaad ka heli kartaa daryeel fidiye ka diwaangashan Medicaidoo aqbala kaarkaaga aqoonsi ee ForwardHealth. Si aad u heshid daryeel bixiye ka deewaangashan Medicaid:

1. booqo [www.forwardhealth.wi.gov](http://www.forwardhealth.wi.gov).
2. dooro **Members** bogga badhtamihiisa.
3. hoos u wad oo dooro **Resources** taabo.
4. dooro **Find a Provider (Hel khidmad bixiye)**.
5. hoosta *Program*, dooro **BadgerCare Plus/Medicaid**.

Ama waxaad wici kartaa ForwardHealth Adeegyada Xubnaha at 1-800-362-3002.

## **Vision dheefaha**

Anthem waxay bixisaa faa'idooyinka March Vision Care. Midaan waxaa ka mid ah mid kasta oo ka mid ah waxyaabahaan iyo adeegyadan sannad kasta ah:

- Baaritaanka indhaha
- Qaabka ookiyaalaha indhaha
- Muraayadaha ookiyaalaha indhaha
- Bedelida muraayadaha ookiyaalaha indhaha
- Muraayadaha la xirto (bedelka qaabka iyo muraayadaha loogu talogalay xubnaha la doortay)
- Bedelka muraayadaha indhaha (loogu talogalay xubnaha la doortay)

Xoogaa xadidaado ah ayaa arrintan lagu dabakhayaa. fareemka okyaalaha iyo and quraaradiisa waxa ah in March Vision Care bixiyo. Si aad xog dheeraada u heshid ka wac March Vision Care lamabrka 1-855-516-2724 (TTY 1-877-627-2456) ama booqo bogga internetka [www.marchvisioncare.com](http://www.marchvisioncare.com).

## daawaynta Autismka Adeegyada

Adeegyada Daawaynta xagga dhaqanka waa faa'idooyin ka ceymisan xaga gobolka oo hoos tagta BadgerCare Plus. Waxa suurta gal ah inaad ceymisatid Autism-ka daaweyntiisa oo aad ka heshid adeegyadaa fidiye ka diiwaangashan Medicaid Oo aqbali kaarkaaga ee ForwardHealth ID. Si aad u heshid daryeel bixiye ka deewaangashan Medicaid:

1. gal [www.forwardhealth.wi.gov](http://www.forwardhealth.wi.gov).
2. dooro **Members** bogga badhtamihiisa.
3. hoos u wad oo dooro **Resources** taabo.
4. dooro **Find a Provider (Hel khidmad bixiye)**.
5. hoosta ka eeg *Program*, dooro **BadgerCare Plus/Medicaid**.

Ama waxaad wici kartaa ForwardHealth Adeegyada Xubnaha at 1-800-362-3002.

## HealthCheck adeegyada

HealthCheck waa ku talogalka daboolaya dhammaan baadhitaanda caafimaad ee xubnaha ka yar 21 sannadood. Midaan waxaa ka mid ah daaweynta loogu talogalay dhibaatooyinka caafimaadka la oggadio inta lagu guda jirobaaritaanka. Waa muhiim takhtaradu in ay arkaan xubnaha ay da'doodu ka yar tahay 21 sanno jir si ay ugu sameeyaanbaaritaanada joogtada ah, ma ahan kaliya marka ay xanuunsadaan.

Barnaamijka HealthCheck saddex u jeeddo ayuu leeyahay:

- Si looga hortago loona daaweyyo dhibaatooyinka caafimaad ee loogu talogalay kuwa ay da'doodu ka yar tahay 21 sanno jir
- Si loo kordhiyo oggaanshaha adeegyada caafimaadka khaaska ah ee loogu talogalay kuwa ay da'doodu ka yar tahay 21 sanno jir
- Si loo siiyo dheefaha caafimaadka kuwas oo aan caadi ahaan ceymiska ku jirin ee loogu talogalay kuwa ay da'doodu ka yar tahay 21 sanno jir

Baadhitaanda HealthCheck checkup waxa kamid ah:

- Tallaalo da'da-ku-habboon (durid).
- Baaritaano sheybaar kaadida iyo dhiiga ah (ay ku jirto baaritaanka heerka dhiiga marka ay da'du-ku-habboon tahay).
- Baaritaanka ilkaha iyo wareejin loo wareejiyo takhtarka ilkaha midaas oo bilaabanaysa da'da hal sanno.
- Taariikhda koritaanka iyo caafimaadka.
- Baaritaanka maqalka.
- Baaritaanka jirka.
- Baaritaanka aragga.

Ilmaagu ea inuu helaa HealthCheck marka uu da'ahan gaadho:

- |                           |             |
|---------------------------|-------------|
| • Dhallashada illaa 1 bil | • 12 bilood |
| • 2 bilood                | • 15 bilood |

- 4 bilood
- 6 bilood
- 9 bilood
- 18 bilood
- 24 bilood
- 30 bilood

Marka uu ilmahaagu gaadho 3 jir, wan in loo sameeya baadhitaan sannadleh ah oo ay u qabanaysoHealthCheck ilaa uu gaadho 20 jir.

Si aad u ballansatid badhitaanka HealthCheck ama si aad u heshid xog dheeri ah, wac lambarka adeega xubnahaooh oo ah 1-855-690-7800 (TTY 711).

Haddii aad u baahanthay gaadiid HealthCheck aad sii ballansato, fadlan wac lambarka waaxda adeegyada caafimaadka (DHS) maamulaha gaadiidka xaaladaha aan dedega ahayn (NEMT) oo ah 1-866-907-1493 (TTY 711) ballanso gaadiid.

## **Transportation faa'idooyinka**

Gaadiidka xaalada caafimaadka aan deg-degga ahayn (NEMT) waxaa laga helayaa tooska maamulaha gaadiidka xaalada caafimaadka aan deg-degga ahayn ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka. Maamulaha xaalada caafimaadka aan deg-degga ahayn ayaa habbeynaya oona ka bixinaya lacagta xubnaha si ay gaariga u raacaan una aadaan ballamaha daryeelka caafimaadka la ceymiay tooska:

- Gaadiidka dadweynaha, sida baska magaalada.
- Ambalaasyada xaalada caafimaadka aan deg-degga ahayn.
- Baabuurta caafimaadka khaaska ah.
- Noocyoo kale oo baabuur ah, ayada oo ay ku xiran tahay baahiyada xubinka ee gaadiidka iyo caafimaadka.

Haddii aad isticmaashid raacitaanka baabuurka khaaska ah midkaas oo aad ku aadid kagana timaadid ballamahaaga daryeelka caafimaadka ee la ceymiay, waxaa dhici karta in aad awoodid in aad heshid magdhowga safarka. Wac lambarkan MTM ee 1-866-907-1493 (TTY 711) intaanaad ballantaada tegin

Waa in aad samaysatid baabuur raacid joogto ah ugu yaraan labbo maalin shaqo ka hor ballantaada. Wuxaad sii qorshaysan kartaa gaadiid caadi ah, adigo wacaya maamlaha NEMT oo lambarkiisu 1-866-907-1493 (TTY 711), isniin illa jimce 7-da subaxnimo ilaa 6 fiidnimo waqtiga degmada Sidoo kale waxaad ballan baabuur raacid ugu samaysan kartaa ballamaha deg-degga ah. Wuxaan kugu siin karnaa baabuur raacid aad ku aadid ballamaha deg-degga ah saddex saacadood gudahooda.

## **Faa'idooyinka armashiiyaha**

Wuxaad heli kartaa rajeeto uu kuu qoray takhtar, takhasusleh ama takhtar ilkaha ah oo ka diwaan gashan Anthem. Wuxaad heli kartaa rajeetoojin ceymisan iyo alaaboo farmashiiyaha lagu iibyo oo aqbalaysa kaarka aqoonsigaaga ee ForwardHealth.

Si aad u heshid farmasheeyo aqbalaysa kaarkaaga aqoonsiga ee ForwardHealth:

1. gal [www.forwardhealth.wi.gov](http://www.forwardhealth.wi.gov).
2. dooro **Members** bogga badhtamihiisa.
3. hoos u dhaahdhac oo dooro **Resources** taabo.
4. dooro **Find a Provider (Hel khidmad bixiye)**.
5. hoosta ka eeg *Program*, dooro **BadgerCare Plus/Medicaid**.

Haddii aad su'aalo ka qabtid rajetooyinka iyo kuwee baa ceymiska ku jira, fadla wac lambarka ForwardHealth ee adeega xubnaa oo ah 1-800-362-3002.

Waxaa dhici karta in aad haysatid wada bixin lacag ama xadan ku saabsan daawooyinka la ceymiyay. Haddii aadan awoodin lacag wada bixintaada, weli waxaad qaadan kartaa qoraalladaada daawo.

## **adeegyada daryeelka shakhsiga ah**

adeegyada daryeelka shakhsiga ah waa hawlgallo caafimaad ku caawin karta xubnaha xaqqa u leh inay ku noolaadaan guryohooda ama bulshadooda dhexdeeda. Adeegyadaasi waxa suurtagal ah in laugu qabto gurigaaga si lagaag caawiyo maalin nololeedkaaga. adeegyada daryeelka shakhsiga ahi waxa qayb ahaan kara in guriga lagaaga shaqeeyo. Daryel fidiyahaagu waaa inuu ogolansho ka bixiyaa in adeega adeegyada daryeelka shakhsiga ah laguu qabto.

## **Helidda aragti takhtar labaad**

Haddii aadan oggolayn soo jeedinta daaweynta takhtarkaaga, waxaad awoodi kartaa in aad samaysid ra'yi caafimaad labbaad. Kala xiriir takhtarkaaga ama Adeegyada Xubinka lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711) si aad u heshid maclumaaad.

## **Helidda koox xirfadyaal caafimaadeed**

Waxaynu hubsanaynaa in kooxda caafimaadka, midaas oo ka kooban takhtaro, kalkaalisooyinka iyo shaqaalaha taageero, in ay teleefoonka ka qabtaan xubnaha iyo takhtarada doonaya in ay ka hadlaan arrimaha Isniinta illaa Jimcahaa ugu yaraan sideed saacadood maalintii, marka laga reebo maalmaha fasaxa ah.

waxaad waci kartaa lamabarka adeega xubnaha oo ah 1-855-690-7800 (TTY 711) inta u dhaxaysa 8 subaxnimo iyo 5 galabnimo, ciddii shaqaalaha ee joogaa waxaa uu kuu gudbinyaa cidda ugu haboon ama ku shaaqo leh, si looga jawaab celiyo su'aalahaaga. Waaad wici kartaa Adeegyada Xubinka kadib 5 p.m. si aad fariin u dhaaftid. Fariintaada waxaa laga soo jawaabi doonaa maalinta shaqo ee xigta.

## **addegyo aan ku jirin ceymiska Anthem ama gobolka**

Adeegyada qaar kuma jiraan ceymiska Anthem ama gobolka. Haddii aad dooratid in aad qaadatid adeegyada aan la ceymin, waxaa khasab kugu ah in aad aqbashid mas'uuliyada maaliyadeed oona u samaysid qorshe lacag bixin qoran takhtarkaaga.

Halkan ka eeg kuwa aan ceymiska Anthem iyo gobolka ku jirin:

- Adeeg kasta oo aan caafimaad ahaan lagama maarmaan u ahayn.
- Adeeg kasta oo u baahan oggolaansho hore oo anaga bixino midkaas oo aynaan bixinin ama aadan codsanin ka hor inta aadan qaadanin adeegga. Midaan ma khuseyso adeegyada xaalada caafimaadka aan deg-degga ahayn.
- Adeeg kasta oo aan ku jirin qyabta ceymiska iyo faa'idooyinka gobolka (*Plan and state benefits*) (na soo wac haddii aad arki waydid adeega aad u baahanthay)

- Nidaamyada hawshabaaritaanka ama tijaabada.
- Daryeelka, oo uu la socdo adeegyada xaalada caafimaadka deg-degga ah, midkaas oo aad ka qaadatid meel ka baxsan Waddanka United States, Canada iyo Mexico midkaas oo uu bixiyo daryeel bixiye ama cusbitaal aanan haysanin bangi Maraykan ah.
- Daryeelka loogu talogalay dhibaatooyinka xiriirka la leh shaqada oona lacag lagu siin karo magdhowga shaqaalaha, qofka aad u shaqaysid ama sharciyada cudurka xiriirka la leh-shaqada.
- Qaliinka ama daawooyinka kugu caawinaya in aad uur qaadid.
- Qaliin qurxin sida in la tir-tiro sawiro jirka lagu sameeyo ama hagaajinta durushada dhegtä.
- Daaweyn duco lagu daaweyyo ama qaabab diimeed.
- Qaliin bedelid-nooca qofka ah ama daaweyn.

wac lamabrka deegyada Xubinka ee Anthem oo ah 1-855-690-7800 (TTY 711) haddii aad su'aal ka qabtid adeegyada ka baxsan faa'idooyinkaaga.

## **Helidda daryeelka muddada uurka iyo umulidda**

---

Haddii aad uur qaadid, fadlan ka wac Adeegyada Xubinka lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711) uguna sheeg isla markiiba wakaaladdaada degaanka ee Dakhliga Masruufka (IM). Midaan waxay tahay si aad u heshid daryeelka dheeraadka ah ee aad u baahan tahay. Waxaad heli kartaa wakaaladda ee degmadaada IM haddii aad wacdidi lambarkan: 1-800-362-3002 ama aad gashid [www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency](http://www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency). Khasab kuguma ahan in aad bixisid lacagta wada bixinta ah marka aad uur leedahay.

Waxaa kugu waajib ah inaad tagtid cusbitaal kamida ha Anthem si aad u umushid La hadal takhtarkaaga Anthem si aad u hubsatid in aad garanaysid nooca cusbitaalka la aadayo marka la gaaro wakhtiga aad ilmahaaga dhalaysid. Ha ka bixin degmada haddii aanaad ogolaansho ka haysanin Anthem. Takhtarkaaga ee Anthem waxa uu ogyahay sooyaalkaaga caafimaad, waana ka ugu fiican ee ku caawin kara Haddii aad ka soo qaybgashid Anthem adigoo galay qaybta labaad ama saddexaad ee uurkaaga, waxa suurta gal ah in laguu daayo takhtarkaagi, xitaa haddii uu ka baxsayahay barnaamijkaAnthem.

Sidoo kale, la hadal takhtarkaaga haddii aad qorshaysatid in aad safartid bisha u dambaysa ee uurkaaga. Waxaan doonaynaa in aad la kulantid khibrad dhalid caafimaad leh, sidaas darteeda ma ahan wakhti adiga kuu wanaagsan in aad safartid.

## **Faa'idooyin muddada uurka iyo umulidda**

Muddada aad joogaysid cusbitaalka waxay ku tiirsanaan doontaa xaaladaada iyo baahiyada ka-dib marka aad dhashid. Waxaad xaq u leedahay in aad joogtid cusbitaalka ugu yaraan 48 saacadood ka-dib marka aad ka dhashid xubinka taranka. Waxaad xaq u leedahay in aad joogtid cusbitaalka ugu yaraan 96 saacadood ka-dib marka aad ku dhashid qalliinka uur-dooxa.

Waxaynu ceyminaa:

- Booqashooyinka takhtarka iyo giddi khubarada uurka, dhibaatooyinka uurka iyo Daryeelka umulidda ka dib haddii uu caafimaad ahaan laga maarmi waayo.

- Daryeelka ay bixiyaan takhtarka taranka, kalkaaliso fasaxan, umuliso iyo takhtarka qoyska.
- Baaritaano sheybaar loo baahan yahay.
- Baaritaan HIV-Aydhis, daaweyn iyo la-talin loogu talogalay xubnaha uurka leh.
- Adeegyada xarunta dhalida.
- Ka dhalida xubinka taranka iyo qaliinka uur-dooxa.
- Baaritaano lagu sameeyo ilmaha dhashay.
- Booqasho ka war hayn ah loo qabto hooyada iyo ilmaha muddo laba caso gudohood, haddii goor hore loo fasaxay (ku jirtaanka cusbitaal muddo ka yar labo casho haddi si dabiiciya ay u umushay iyo muddo ka yar afar casho hadii ay qallin ku umashay) marka uu takhtarku amo oo ay hooyaduna ogolaato.

## **Urka halistiisu sarrayso**

Waa muhiim inaad lahaatid uur caafimaad qab ah. Qaar kamid ah xaaladaha waxay ku gelin karaan khatar. Waxaa dhici karta inaad qabtid uur khatar-sare leh haddii:

- Aad tahay qof ka yar 18 sanno jir ama ka weyn 35 sanno jir.
- Aad qabtid mid ka mid ah arrimahaan caafimaadka:
 

<input type="radio"/> Sonkorow <input type="radio"/> Murugo <input type="radio"/> Isticmaalida tubaakada ama sigaarka <input type="radio"/> HIV-Aydhis	<input type="radio"/> Cudurka neefta <input type="radio"/> Cudurka wadnaha <input type="radio"/> Dhiig kar
--	--
- Hore u qabtay ilmo dhicis uur hore ah.
- U qaadanaysid daawo si maalin le ah oona la kulantid takhtar khaas ah.

Haddii aad aaminsantahay inaad qabtid uurka khatarta-sare leh, way kuu wanaagsantahay inaad kala hadashid wel-welkaaga takhtarkaaga si asaga/ayada kuugu caawiyaan inaad ilaalisid khataradan.

## **O helidda faa'idooyinka ilmaha**

Marka aad dhashid, wac wakaaladda degaanka Dakhliga Masruufka (IM) si aad u heshid dheefaha caafimaadka loogu talogalay ilmahaaga. Marka ilmahaaga la qoro, waxaad wici kartaa Adeegyada Xubinka si aad u dooratid bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP) ee loogu talogalay ilmahaaga.

## **New Baby, New Life<sup>SM</sup> barnaamijka maamulida hooyonimada**

New Baby, New Life<sup>SM</sup> waa barnaamijka Anthem ee loo yeelay hooyoyinka uurka leh. Waxaa aad umuhiim ah inaad booqtid takhtarka daryeelka guud kuu fidiya (PCP) ama takhtarrada taranka ama ka dhalmada t (OB/GYN) si luguu daryeelo intaad uurka leedahay. Nooca daryeelkan waxaa lagu magacaabaa daryeelka dhalmada ka hor. Waxay kugu caawin kartaa inaad dhashid ilmo caafimaad qaba. Daryeelka dhalmada ka hor waa mid marwalba muhiim ah xitaa haddii aad hore u dhashay ilmo. Barnaamijkeena, xubnaha waxay qaataan macluumaad

caafimaad iyo abaal marin gaaraysa \$50 ee ku saabsan helida daryeelka dhalmada ka hor iyo dhalmada kadib.

Barnaamijkeena sidoo kale wuxuu ku caawinaya xubnaha uurka leh ee qabba baahiyadaa daryeelka caafimaadka adag. Maamulayaasha kiiska kalkalisada waxay si dhow ula shaqaynayaan xubnahaan si ay u bixiyaan:

- Waxbarasho
- Taageero dareen
- Caawimaad laguugu caawinayo raacida qorshahooda daryeelka takhtarka
- Maclumaad ku saabsan adeegyada iyo khayraadka laga helo gudaha bulshadaada, sida gaadiidka, WIC, fasalo dhalmada ka hor ah, naasnuujin iyo la-talin

Kalkaalsooyinkeena sidoo kale waxay la shaqeeyaan takhtarada waxayna ku caawinaayaan adeegyada kale ee ay dhici karto in ay xubnuhu u baahdaan. Hadafku wuxuu yahay in kor loo qaado caafimaadka wanaagsan ee xubnaha loona dhalo carruur caafimaad qab ah.

### **Daryeel tayo sareeya oo iddin socda adiga iyo ilmaha**

Anthem, waxaan doonaynaa in aynu kugu siino daryeelka ugu wanaagsan inta lagu guda jiro muddada uurkaaga. Sidaa awgeed waxaa ka qab noqonaysaa My Advocate®, oo ka mid ah barnamijka New Baby, New Life™. My Advocate® oo kuu suurta galinya maclumaadka aad u baahantahay iyo gargaarka aad u baahantahay si aad u ilaashatid caafimaadkaaga inta ad uurka leedahay.

### **Waa inaad ogaataa My Advocate®**

My Advocate® waxaa uu gudbiyaa tacliin xagga hooyonimada, oo u adeegsanayo telefoonka, farriimaha iyo and app-ka mobilada, oo si faa'ido io xiiso leh. Wuxaad is barnadoontaan Mary Beth, qofka My Advocate® automated meshiinka ah. Mary Beth waxay ka jawaabi doontaa baahiyahaaga isbedelaya intiiba uu ilmahaagu kobcayo oo uu korayo. Wuxaad ku xisaabtami kartaa:

- Waxbarashada aad isticmaali karto
- La xidhiidhka maamulaha xaaladdaada ee My Advocate® waxa uu ka jawaabi farrimo wixii su'aalo ah ee soo baxa
- Ballan jadwal xiriir fudud
- Adiga aan wax lacag ah kuugu fadhinin

Adigoo adeegsanay My Advocate®, maclumaatkaagu waxay aahaanay sir ilaashan. Wakhti kasta oo ay ku soo wacdo Mary Beth, waxay ku weydiin doontaa sannadka dhallashadaada. Fadlan haka noq-noqonin in aad u sheegtid. Ayadu waxay u baahan tahay maclumaadka si ay u hubsato in ay la hadlayso qofka saxda ah.

### **In lagaa caawiyo inaad adiga iyo ilmahaagu aad caafimaad ahaataan**

Telfoonada My Advocate® laaga soo wacayo waxay ku siinayaan jawwbbo ku socda su'aalaha aad qabtid, iyo sidoo kale gargaar caafimaad haddii aad u baahatid. Waxaa jiri doona hal wicitaan muhiim ah oo ku saabsan baaritaanka caafimaadka midkaas oo soo raacaya wacyi gelin waxbarasho joogto ah. Dhammaan waxa aad u baahan tahay in aad samaysid waxay tahay in aad dhagaysatid, baratid kana jawaabtid su'aasha ama labbo midaas oo aad ku samaysid telefoonka.

Haddii aad noo wargelisid inaad debaato la kulantay, waxaa kula xidhiidhi maamule xaalad. My Advocate® oo kaala hadli arrimahan:

- Daryeelka dhalmada kadib iyo uurka
- Daryeelka ficnaanshaha-ilmaha
- Daryeelka ilkaha
- Tallaalada
- Talooinka nolosha caafimaadka leh

Si xog dheeri ah u heshid, wac Anthem adeegyada xubinka si aad ula hadashid maamule xaalad ah OB ama bboqo myadvocatehelps.com.

### **Markaad uur yeelatid**

Haddii aad u malaysid in aad uur leedahay:

- U wac bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) ama takhtarka OB/GYN isla markiiba. Adigu uma baahnid wareejin uu ku wareejiyo bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) si aad ula kulantid takhtarka OB/GYN.
- wac lamabarka adeega xubnaha haddii aad u baahtid dhakhtar taraka OB/GYN ama dumarka oo ku xidhan Anthem.

Marka aad oggaatid in aad uur leedahay, sidoo kale waxaa khasab kugu ah in aad wacdid Adeegyada Xubinka.

Waxaan kuu soo diri doonaa xirmo waxbarasho uurka ku saabsan. Waxaa kamid noqon doona:

- Warqad hambalyo.
- Buug daryeelka-nafta ah midkaas oo ay ku qoran yihiin macluumaad ku saabsan uurkaaga; sidoo kale waxaad u isticmaali kartaa buuggan si aad ugu qortid waxyaabaha dhaca inta lagu guda jiro muddada uurkaaga.
- Macluumaad ku saabsan sida dib loogu celiyo abaal marinadaada \$25 ee loogu talogalay daryeelka dhalida kahor .
- My Advocate® wargeys kooban oo kaaga warramaya barnaamijka iyo sida looga diiwaan galo iyo sida loo heli lahaa xogo caafimaadeed, laguu soo marinay Telefoonkaaga siyabo ay ka mid tahay farrimo cod duuban, friiimo qoraal ah, iyo App-ka mobaylka.
- *Having a Healthy Baby* waa wargeys kooban oo faa'ido badan leh.

Marka aad uurka leedahay, waxaad u baahan tahay in aad ka taxadirtid caafimaadkaaga. Waxaad awoodi kartaa in aad ka heshid cunto caafimaad leh dhinaca barnaamijka Carruurta, Dhallaanka iyo Dumarka (WIC).

Marka aad uurka leedahay, waxaa khasab kugu ah in aad aadid bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) ama OB/GYN ugu yaraan:

- Afar todobaad kasta ee lixda bilood ee ugu horaysa
- Labbo todobaad kasta ee bilaha siddeedaad iyo todobaad
- Todobaad kasta inta lagu guda jiro bisha u dambaysa

Bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) ama OB/GYN waxaa dhici karta in uu kaa doonayo in aad booqatid in badan midaana waxay ku salaysan tahay baahiyada caafimaad.

## **Marka aad yeelanaysid ilmo cusub**

Marka aad dhashid ilmahaaga, adiga iyo ilmahaaga waxay joogi karaan cusbitaalka ugu yaraan:

- 48 saacadood kadib ka dhalida xubinka taranka ah
- 96 saacadood kadib umulista qallaainka ah (C-section)

Waxaa dhici karta in aad joogtid cusbitaalka wakhti yar haddii bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) ama OB/GYN oona ay u aragto qofta siisa daryeelka ilmahaaga in adiga iyo ilmahaaga aad wacantihiin. Haddii adiga iyo ilmahaaga ka baxdaan cusbitaalka xili hore, bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) ama OB/GYN waxay kaa codsan karaan in aad ku samaysid booqasho shaqaale ama kalkaaliso gudaha-guriga ah 48 saacadood gudahooda.

Ka-dib marka aad dhashid ilmahaaga, waxaa khasab kugu ah:

- In aad u wacdid sida ugu dhakhsiyaha badan ee aad u awoodid Adeegyada Xubinka si aad ugu sheegtid maamulaha kiiskaaga in aad dhashay ilmahaaga. Waxaynu u baahnaan doonaa faah-faahinno ku saabsan ilmahaaga.
- Wac wakaaladaada degaanka Dakhliga Masruufka (IM) si aad u codsatid Medicaid-ka loogu talogalay ilmahaaga.

## **Ka dib markaad ilmahaaga umusho**

Anthem waxay kuu soo diri doontaa xirmo waxbarasho dhalmada kadib ah kadib marka aad dhashid ilmahaaga. Waxaa kamid noqon doona:

- Warqad hambalyo
- Buug-yaraha quudinta ee ku qoran macluumaadka ku saabsan daryelida ilmahaaga hadda dhashay
- Macluumaad ku saabsan sida dib loogu celiyo abaal marinadaada \$25 ee loogu talogalay booqashadaada dhalmada kadib
- Qoraal yar oo ku saabsan murugta dhalmada kadib
- *Making a Family* oo ah wargeys kooban

Haddii aad ka diiwaan gashanayd My Advocate® oo laguu soo diray telefoonno wacyi galin ah, waxaad heli doontaa telefoonno kale oo ku saabsan umumlidda ka bacdi iyo caafimaadka ilmaha ilaa weega 12-ad umulidda kadib.

Waa muhiim in aad booqasho ka samaysatid bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) ama OB/GYN kadib marka ilmahaaga lagu sameeyobaaritaanka dhalmada kadib. Waxaad dareemi kartaa ficnaansho waxaadna isdhiihi kartaa waad caafimaadaysaa, laakiin jirku waxay ku qaadanaysaa ugu yaraan lix todobaad si uu u bogsado kadib marka aad dhashid.

Booqashadu waa in lagu sameeyo inta u dhaxaysa 21 iyo 56 maalmood kadib marka aad dhashid.

Haddii aad ku dhashay qaliinka uur-dooxa, bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) ama OB/GYN waxay ku weydiin karaan in aad dib ugu soo noqotidbaaritaan hal- ama labbo-todobaad kadib-qaliinka. Midaan looma tixgelinayo in ay tahaybaaritaan dhalmada kadib ah. Adigu welii waxaad u baahnaan kartaa in aad dib ugu noqotid oona kula kulantid bixiyahaaga 21 illaa 56 maalmood gudahooda kadib marka aad dhashid si aad u samaysidbaaritaankaaga dhalmada kadib ah.

**gargaarkanaasnuujinta**

Gargaagrka naasnuujintu waa u diyaar hooyooyinka cusub oo ay ka hele kartaa lambarka 24/7 NurseLine oo ah 1-855-690-7800 (TTY 711).

## **barnaamijka haweenayda, dhallanka, iyo caruurta**

Sidoo kale waxaad caawimaad ka heli kartaa dhinaca barnaamij khaas ah oo lagu magacaabo Dumarka, Dhallaanka, iyo Carruurta (WIC). Barnaamijka Dumarka, Dhallaanka, iyo Carruurta wuxuu siiyaa cunto caafimaad leh dumarka uurka leh iyo hooyooyinka haysta carruur yar-yar. Si aad aqqaan u kororsato, wac 1-800-722-2295 ama booqo <https://www.dhs.wisconsin.gov/wic/index.htm>.

## **Text4baby**

Waxaan dan ka leenahay caafimaadka hooyooyinka iyo dhallaanka, waxaanu ku faanyanaa inaanu soo gudbinno adeega Text4baby. Text4baby oo ah adeeg caafimaad loo isticmaalayo mobileka oo bilaash ah, oo ay soo agaasiimay uruka National Healthy Mothers, Healthy Babies Coalition (HMHB), oo loogu talo galay in la kobciyo caafimaadka hooyada iyo dhallaanka ayadoo loo adeegsanayo farriimaha qoraalka ah. Ku hel todobaad kasta qoraal fariimo bilaash ah teleefoonkaaga gacanta si uu kuugu caawiyo urkaaga iyo sannadka ugu horeeya ee ilmahaaga. Si aad iskugu diiwaan gelisid, si fudud fariin ugu dir BABY lambarkan 511411. Wixii ku saabsan macluumaa dheeraad ah ama si aad u heshid liis buuxa oo ku saabsan sidayaasha teleefoonka gacanta ee bixinaya adeegaan, fadlan booqo text4baby.org. Xusuusnoow: Barnaamijkan lagama heli karo SafeLink, Straight Talk iyo qaar kamida khidmadda TracFone.

## **Healthy Rewards Barnaamijka**

---

Waxaad ku heli kartaa abaal-marino marka aad samaysid waxyaabaha u wanaagsan caafimaadkaaga.

Way fududahay. Wixa kaliya ee lagaaga baahanyahay inaad iska diiwaan galisid barnaamijka Healthy Rewards! Kadib lacag baa surta gal ah in laguugu shubo kaarkaaga Healthy Rewards markaa aad dhamaystirtid hawlgal caafimaad. Waxaad u isticmaali kartaa kaarkaaga si aad uga iibsatid waxyaabaha fiicnaanshaha iyo caafimaadka laga gato dukaamada la doortay. Dooro liiska hoose kadibna fiiri waxa aad u qalantid.

<b>Yaa xaq u leh</b>	<b>Hawlgallo caafimaad</b>	<b>Abaal marin</b>	<b>xadka</b>
<b>Caruurta galaysa 2-da sanadood</b>	Qaado tallaalka saddexlaha ah (combo 3) ee difaaca jidhka intaanaad gaadhin 2 sanadood.  Combo 3 waxaa kamid ah: Gawracatada, Tiitanoska and Xiiqdheerta (DtaP), dabaysha (IPV), jadeecada, Qaamo-qashiirta, Rubellada (MMR), hargab H nooca B (HiB), jooniska B (HepB),	\$10	Hal xubin kasta

	hablobaasta/ Fayraska 'Varicella Zoster (VZV), qaaxada(PCV).		
	Hel dhammaan tallaalada Combo 10 kahor da'da 2.  Combo 10 waxaa kamid ah: dhammaan tallaalada Combo 3, Feyraska-Rota (ROTA), Ifilada (Hargab) iyo Cagaarshowga A (HepA)	\$10	Hal xubin kasta
<b>Qaan gaadhka (da'da 18-75) laga helay macaanka</b>	Samee baaritaan sonkorta dhiiga ee cudurka sonkorowga ah (A1c)	\$20	Hal 12-kii bilood kasta
	Samee baaritaanka indhaha ee sonkorowga	\$20	Hal 12-kii bilood kasta
<b>haweenayda (da'da 50-74)</b>	Samee baaritaan kansarka naaska ah	\$25	Mar 24-kii bilood ba
<b>qaangaadhka (da'da 18 ama ka weyn) dhawaan loo qoray daawooyinka murugada</b>	Isticmaal daawada sida cusub loogu soo qoray in ay tahay mid lid ku ah wel-welka ugu yaraan lix bilood	\$15	Hal 12-kii bilood kasta ee loogu talogalay warqada daawada cusub
<b>Qaabgaadhka iyo caruurta Adults and children (6 jir ama ka weyn) oo dhawaan ku jiray cisbitaalka sabab caafimaad dhimirka ah.</b>	Waxaad dhmaysaa booqashooyiynka xannanada ee ka war haynta ah ee fidiyaha daryeelka caafimaad muddo 30 casho ku xigta ka soo daynta dhakhtarka ee cudurka dhimirka	\$25	Hal ka bixid kasta ah; ugu badnaan labbo jeer 12-kii bilood kasta
<b>Haweynayda uurka leh</b>	Dhamayso booqashada ugu horreysa (muddo 42 casho gudeheed)	\$25	Hal uur kasta
	Booqasho umulidda kadib oo booxda (inta u dhaxaysa 21 iyo 56 maalood oo umulidda ku xigta)	\$25	Hal uur kasta

Waa in aad kasbatid abaal-marinada isla hadda. Laakiin waa in aad maanta gashid! Wac 1-877-868-2004 (TTY 711) ama gal [mss.anthem.com/HealthyRewards](http://mss.anthem.com/HealthyRewards) Diiwaangashi.

#### Shuruudaha barnaamijkan:

- Waa in aad ku qoran tahay barnaamijka si aad u heshid abaal-marinada.
- Abaal-marinadu waxaa kaliya loo isticmaali karaa in lagu iibsado waxyaabaha laga soo gato dukaanada la doortay.
- Abaal-marinadu looma isticmaali karo in lagu iibsado waxyaabaha online-ka ama internetka laga iibsado.

- Dhammaan hawlaha waxay u hoggaansan yihiin xaddad.
- Waa inaad ahaata xubin Anthem ka mida oo aad buuxisa dalab dhaqdhaqaaq si lagaaga abaal mariyo

wac 1-877-868-2004 (TTY 711) ama gal [mss.anthem.com/HealthyRewards](http://mss.anthem.com/HealthyRewards) si xog dheeriya aad u heshid

## **Barnaamijyada maamulidda caafimaadka**

---

### **24/7 NurseLine**

KhadkeenaKalkaalinta NurseLine 24/7, waxaad ula hadli kartaa kalkaaliyaha si khaas ah una hel jawaabaha su'aalahaaga ku saabsan caafimaadka wakhti kasta, maalin ama habbeen.

KhadkeenaKalkaalinta NurseLine 24/7 waxaad ku heli kartaa si bilaash ah adiga oo soo waca lambarkan

1-855-690-7800 (TTY 711).

### **maamulidda cudurrada (DM)**

Haddii aad qabtid mowduuc caafimaad muddo-dheer, waynu ku caawin karnaa. Barnaamijkeena maamulida cudurka wuxuu kugu caawin karaa maamulida dhammaan qaybaha dhaqaaqa ee daryeelkaaga. Barnaamiju waa mid iskaada, khaas iyo bilaash ah. Koox ka kooban kalkaaliyeyaasha caafimaadka oo liisangaraysan oo la idhaah maamulayaasha xaaldda DM, ayaa kala shaqayndoona (PCP)-kaag si wax lagaaga baro xaaladdaada caafimaad oo lagaa caawiyo sida aad u maamuli lahayd daryeelkaaga caafimaad.

Waad ku biiri kartaa barnaamijka haddii aad qabtid:

- Cudurka neefta.
- Cudurka cirifoodka.
- Cudurka Laabta oo Cufan oo daba dheeraada (COPD).
- Cudurka wadnaha dheef-shiidka ah (CHF).
- Cudurka halbowlaha wadnaha (CAD).
- Sonkorow.
- HIV/AYDHIS.
- Cadaadis dhiiga ah.
- Cilladaha murugada weyn — qaangaadh.
- Cilladaha murugada weyn — cruur/doob.
- Isku-dhex yaac maskaxda ah.
- Cudurka isticmaalida daroogada.

Maamulayaasheena kiiska waxay ku caawinayaan maamulida miisaanka iyo adeegyada joojinta sigaar cabbida.

Kooxda DM ee xaaladah maamula waxay kaala shaqaynyaan sida aad u gaadhi lahayd himilada caafimaad ee aad leedahay. Maadaama aad tahay xubin ka tirsan barnaamijka, waxaad kafaa'ideysan doontaa in aad haysatid maamule kiis midkaas:

- Oo adiga ku dhagaysanaya oona qaadanaya wakhti uu ku fahmo baahiyahaaga.
- Oo kugu caawinaya in aad samaysatid qorshe daryeel oodna gaartid ujeeddooyin daryeel caafimaad.

- Ku siinaya qalabka, taageerada iyo xogaga bulshada kugu caawin kara in aad wanaajisid tayadaada nolosha.
- Ku siinaya macluumaad caafimaad kuwaas oo kugu caawinaya in aad qaadatid doorashooyin wanaagsan.
- Kugu caawinaya in la isku duwo daryeelka takhtaradaada.

Markaad tahay xubin kamida Anthem oo ka diiwaan gashan arnaamijka DM program, waxaad leedahay xuquuq iyo mas'uuliyyado gaara ah

Adiga waxaad xaq u leedahay in aad:

- Inaad aqoon u yeelatid Anthem; arrinkaasina waxa ka mida ah barnaamijyada Anthem iyo adeegyadiisa sidoo kale shaqaalah tacliintooda iyo khibraddooda shaqo, sidoo kale wax heshiisyo aan la galno shirkadaha iyo wakaaldaha kale.
- Diidid in aad qayb ka noqotid ama ka baxdid barnaamijyada iyo adeegyada aynu bixino.
- Oggaatid qofka uu yahay maamulaha kiiskaaga iyo sida loo cogsado maamule kiis kale.
- Anthem iyo takhaatiirta ha kugu caawiyaan go'aan qaadashada daryeelkaaga caafimaad.
- Waxed wax ka ogaataa wax kasta oo ku saabsan wax qabdka kooxda DM; taasina waxa ka mid ah qodobkasta oo ku xusa hagaha, haddii Anthem ceyminyaso iyo in kale; waxaad xaq u leedahay inaad kala hadashid takhtarkaaga ikhiyaar kasta.
- Laga dhigo macluumaadkaaga shakhsiyeed iyo caafimaadka kuwo khaas ah.
- Waxed ogaataa cidda awoodda inay ogaato xogahaaga, oo waxaad ogaataa hab shaqaynta aanu u isticmaalno sidaanu ilaalino amaankaaga, soocnidaada iyo ilaalinta sirahaaga.
- In shaqalaha Anthem kuu la dhaqmaan si edeb iyo xushmad leh.
- Gudbi cabasho ku socota Anthem oo hel hagitaan aad kaga faa'idid adeegsiga tallabooyinka ashtakada, sida muddada ay qaadanayso ka soo jawaabiddeeno iyo xallinta waxii ku saabsan tayadaiyo cabashooyinka.
- Heshid macluumaad cad oona ay fududahay in la fahmo.

Adiga waxaa laguugu boorinayaa in aad:

- Raac talooyinka daryeelka caafimaa ee Anthem.
- U gudbi Anthemmacluumaadka loo baahanyahay si laguugu adeego.
- U sheeg Anthem iyo tkhaatiirtaada haddii aad go'aansatay inaad iska diiwaan saartid barnaamijka DM ee maamulidda Bukaannada.

Haddi aad ku suganthay xaaladahan caafimaad ama aad doonaysid inaad xig dheeriya aad ka heshid barnaamijka maamulidda bukaannada, fadlan wac 1-888-830-4300 isniinta ilaa jimcaha ka bilaw ilaa jimcaha bilaw ahaan 8:30 subaxnimo.ilaa 5:30 casarnimo waqtiga degmada. Dalbo inaad lahadashid maamulaha xaaladda ee DM. Ama u dhig maamulaha xaaladdaada farriin gaar ah oo suurtagal ah 24-ka saacadood maalintti. Waxoo kale inaad booqan kartid boggeena internetka oo ah [www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin) ama wac DM-ta haddii aad doonyasid nuqul xogagta maamuida dryeel aad ka heshay boggaa. Wicitaanku wuxuu noqon karaa tallaabadaada koowaad ee aad ku heshid caafimaad wanaagsan.

## **adeegyada maamulidda daryeelka ee kale**

Sida maamulidda bukaannadaoo kalebarnaamjikayaga maamulka daryeelka ayaa jira si uu uga caawiyo xaaladaha caafimaad ee iskumaran ama sida gaarka ah u adag. Kooxdaan waxay ka kooban tahay kalkaalisooyin diiwaan gashan, takhasuslayaal caafimaad hab-dhaqan iyo shaqaalayaal bulsho kugu caawinaya ujeeddooyinkaaga ficnaanshaha-iyo caafimaadka ee guud. Maamulayaasha kiiska waxay:

- Kugula shaqayn doonaan in ay kugu caawiyaan maamulida baahiyadaada daryeelka caafimaadka.
- Kugu caawin doonaan inaad si fiican u fahantid cuduradaada la oggaaday.
- Kugula shaqayn doonaan adiga iyo takhtarkaaga si ay kuugu dejyaan oona looga dhabeeyo ujeeddooyinka shakhsiyeed si loo wanaajiyo caafimaadkaaga iyo tayada noloshaada.
- Ku siin doonaan caawimaad dheeraad ah inta lagu guda jiro muddada wakhtiga caafimaadkaaga kadib cusbitaal dhigid si loo hubsado inaad fahansan tahay qorshahaaga daryeelka iyo daawooyinka. Maamulaha kiiska wuxuu inta baddan la hadli doonaa cusbitalka si uu kuugu caawiyo qorshahaaga dib ugu soo noqoshada guriga.

Tusaalooyinka qaar ee kamid ah xaaladaha ay wax ka qabtaan waxay yihiin:

- |   |  |
|---|--|
| <ul style="list-style-type: none"><li>• Cudurka halbowlaha wadnaha (CAD)</li><li>• Cudurka neeftha</li><li>• Xanuun kelida ah</li><li>• Xanuun wadnaha ah</li></ul> | <ul style="list-style-type: none"><li>• Sonkorow</li><li>• Uurka khatarta-sare leh</li><li>• Mushkiladaha qaar ee ku saabsan ku xad gudubka daroogada iyo caafimaadka maskaxda</li></ul> |
|---|--|

Haddii aad qabtid mid kamid ah arrimahaan caafimaadka ama arrimo caafimaad khaas ah ama adag oodna doonaysid inaad oggaatid in baddan oo ku saabsan maamulida daryeelka, wac lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711). Sidoo kale waxaad ka dhigi kartaa inuu nala soo hadlo daryeel bixiyahaaga ama takhtarkaaga si aad noogu sheegtid inaad doonaysid inaad oggaatid in baddan oo ku saabsan barnaamijkeena. Maamule kiis ayaa ku soo wici doona haddii asaga ama ayada ay u maleeyaan in adeegyadan ay ku caawin karaan.

## **Barnaamijka Lifeline**

Is ka diiwaangeli barnaamijka Lifeline oo qaado Mobile bilaash ah iyo daqiiqado ku hadlaha bill kasta iyo farrimaha iyo internet oo wada bilaash ah. Wicitaanada la waco Adeegyada Xubinka sidoo kale waa kuwo bilaash ah. Maadaama aad tahay xubin ka tirsan barnaamijka, waxaad heli

doontaa qoraal fariimo caafimaad doorasho ah oo ay ku qoran yihiin nasteexoooyin caafimaad iyo xusuusiyaal ku saabsan baaritaano iyo tallaalada ifilada ee loogu talogalay adiga iyo qoyskaaga.

Si aad xog dheeriya u hesheshid, fadlan wac lamabarka adeega xubnaha oo ah 1-855-690-7800 (TTY 711) ama booqo [www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin).

## Ka dhaafitaanka HMO

---

Guud ahaan waa inaad ka diiwaangashanaataa HMO si aad u heshid adeegyada daryeelka caafimaad eeBadgerCare Plus iyo Medicaid SSI. Ka reebitaanada HMO macnaheedu waxay tahay adiga lagaagama baahna in aad ku biirtid HMO si aad u heshid dheefaha daryeelka caafimaadka. In baddan oo kamid ah ka reebitaanada kaliya waxaa la bixiyaa muddo aad u yar, inta baddan si aad u dhammaysid koorsada daaweynta ka hor inta aadan ku soo biirin. Haddii aad u malaysid in aad u baahan tahay ka reebitaanka ku qorida HMO, ka wac Takhlasluha Isqorida HMO lambarkan 1-800-291-2002 si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

## Caawimaad xubnaha baahyo xagga xidhiidhka leh

---

### Caawimaad afaf kale ku saabsan

Waxaynu bixinaa adeegyo iyo barnaamijyo ka soo baxaya baahiyadaada luuqadeed iyo dhaqameed oona kuu oggolaanaya in aad heshid daryeel tayo leh. Waxaynu isticmaalnaa adeeg turjumaan midkaas oo la shaqeeya wax ka baddan 140 luuqadood. Waxaynu doonaynaa in aad heshid daryeelka saxda ah, sidaas darteeda waxaynu kugu siinaa adeegyadan si bilaash ah:

- Anthem shaqaalaha adeega xubnaha oo awoda iany kuu caawiyaan afkaaga hooyo.
- Turjubaano telefoon 24-saac ah
- Luuqada dadka dhagoolayaasha ah iyo turjubaano fool-ka-fool ah
- Qalab qorshe caafimaad oo ku qoran luuqada aad jeceshahay (Wac Adeegyada Xubinka si aad u codsatid waxyaabaha ku qoran luuqadaha aanan ahayn-Ingiiriisi.)
- Takaatiir kugu caawin kara adiga luuqadaada

Haddii aanad af-ingriiska ku hadlin waxaad xaqq u leedahay inaad codsatid Turjumaan bilaash aha Fool-ka-fool ama turjumaan xagga telephoonka. Si aad u codsatid turjubaan telefoon, naga soo wac lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711) Isniinta illaa Jimcaha laga bilaabo saacadaha 8 a.m. illaa 5 p.m. wakhtiga gudaha. To request a Turjumaan fool-ka-fool, kamid tahay af-dhagoolka, wac adeegayada xubnaha shan casho ugu yaraan intaanad booqashdaada qaban

### Caawimaadda xubnaha la' codka, wax maqalka ama wax araga.

Waxaynu leenahay lambar taleefoon lacag la'aan ah oo loogu talogalay xubnaha aan hadli karin ama wax maqlin. Lambarkan telefoonka TTY waa 711. lambarka TTY waxa lagala xidhiidhi karaa adeegyada xubnaha isniinta ilaa jimcaha bilaw ahaan 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo sida waqtiga degmada waxaana loo adeegsan karaa la xidhiidhka 24/7 NurseLine si joogto ah.

Waxaynu ku bixinaa buuggaan iyo waxyaabo kaleba ayaga oo ah qaabab kale oona loogu talogalay xubnaha aan wax maqlin ama wax arkin. Nasoo wac haddii aad u baahantahay caawimaad laguugu caawiyo akhrinta buuggaan ama waxyaabaha kale.

## **Digreetada dadka mareykanka ee naafada ah ee 1990**

Waxaynu kasoo baxnaa Qaanuunka Dadka Maraykanka ah ee qabba Nafooyinka (ADA) ee 1990. Qaanuunkan wuxuu kaa ilaalinaya midab takoor aynu kugu samayno midkaas oo ay sabab u tahay naafonimo. Haddii aad dareentid in laguula dhaqmay si dadka kale ka duwan midaas oo ay sabab u tahay naafonimo, ka wac Adeegyada Xubinka ama khadka TTY ee lagu soo sheegay qaybta lasoo dhaafay.

## **Helidda mucaawimada markaad su'aalo ama mushkilad qabtid**

---

### **Anthem's xubinnad abuukaatooyinka ah**

Anthem waxay leedahay xubinno abuukaatooyin ah oo kugu caawinaya inaad heshid daryeelka caafimaad ee aad u baahantahay. Waxaa khasab kugu ah in aad la xiriirtid Abuukaatooyinka Xubinka haddii aad u baahatid caawimaad laguugu caawiyo wax kasta oo su'aalooyin ama mushkilado ah oo aad qabtid kuwaas oo xiriir la leh helida adeegyada daryeelka caafimaadka. Wuxaa kala xidhiidhi kartaa abuukataha xubnaha lambarkan 1-262-523-2424 ama email-kan WIAnthemMedicaidMemberAdvocates@anthem.com.

### **Abuukaate (ku talaga Medicaid SSI oo kaliya)**

haddii aad la kulantid dhibaatooyin xaga daryeelka caafimaad adigoo ka diiwaan gashan Anthem xagga Medicaid SSI, wac lambarka xuquuqda naafada ee gobolka Wisconsin oo ah 1-800-708-3034 or 1-414-773-4646 (Milwaukee area). markaad wacidi, dalbo inaad lahadishid abuukaataha debedeed ee SSI.

### **State of Wisconsin HMO barnaamijka cadaadla ilaaliyaasha**

Gobolka wuxuu u xilsaaray dad gacanta ku haya arimaha dulmiga ah (dadka bixinaya caawimaad dhix-dhexaad, sir oona rasmi ahayn) kuwaas oo kugu caawin kara wax kasta oo su'aalo ama mushkilado ah oo aad qabtid maadaama aad tahay xubin ka tirsan HMO. Dadka gacanta ku haya arimaha dulmiga ah waxay kuu sheegi karaan sida aad uga heli kartid daryeelka aad u baahantahay dhinaca HMO-taada. Dadka gacanta ku haya arrimaha dulmiga ah waxay sidoo kale kugu caawin karaan in la xaliyo dhibaatooyinka ama cabashooyinka aad qabbi kartid ee ku saabsan barnaamijka HMO ama HMO-taada. Wac lambarkan 1-800-760-0001 oo wadiiso cadaalad ilaaliyaha.

# **Gudbinta ashkatooyinka, cabasho iyo racfaanka**

---

## **Ashkatooyinka iyo cabashoooyinka**

Waxaanu jecelnahay inaanu ogaanno haddii waligaa aad ka u haysid dhaliilo daryeelka laguu fidiyay, adeegyada ama ha dhaqmeedka oo ku saabasan takhtarrada, tallaabaha adeega ama qaybaha kala duwan ee Anthem. fadlan wac lambarka 1-855-690-7800 (TTY 711) oo waydii abuukaataha xubinka. xagga kalena waxaad la xidhiidhi kartaa lambarka abuukaataha xubinka Anthem oo ah 1-262-523-2424 ama email-ka oo ah

WIAnthemMedicaidMemberAdvocates@anthem.com. Sidoo kale waxaad warqad noogu soo diri kartaa cinwankan haddii aad qabtid cabasho:

Central Appeals Processing  
Anthem Health Plans of Wisconsin, Inc.  
P.O. Box 62429  
Virginia Beach, VA 23466-2429

Wac Adeegyada Xubinka haddii aad u baahan tahay caawimaad laguugu caawiyo dirida faylka cabashada ah. Waxaynu kuu keeni kartaa turjubaan haddii aadan ku hadlin luuqada Ingiriiska.

Waxaad u baahnaan doontaa in aad noo sheegtid:

- Qofka ku lug leh cabashada.
- Waxe dhacay.
- Goorta ay mushkiladu dhacday.
- Halka ay mushkiladu ka dhacday.
- Sababta aadan ugu faraxsanayn daryeelka aad qaadatay.

Kaddib markaanu helni ashkatadaada telefoon ahaan ama e-mail ahaanm waxaanu kuu soo diraynaa waraaq sheegaysa inaanu helnay ashkatadaada 10 casho gudiheed.

Waxaynu ku qaadan doonaa go'aan ku saabsan cabashadaada 30 maalmood gudahooda marka aynu helno cabashada. Qof aanan ku lug lahayn go'aankii hore ee la gaaray ayaa dib u eegid ku samayn doona cabashadaada. Waxaynu kuu soo diri doonaa warqad lagu xalinayo cabashada.

Warqadan waxay:

- Sharxi doontaa cabashadaada.
- Kuu sheegi doontaa waxa la sameeyay si loo xaliyo dhibaatadaada.
- Kuu sheegi doontaa sida loo codsado rafcaan haddii aadan oggolayn go'aanka aynu gaarnay.
- Kuu sheegi doontaa sida loo codsado dhagaysi gobol cadaalad ah.
- Kuu sheegi doontaa sida loogu diro fayl cabasho qofka gobolka gacanta ugu haya arrimaha dulmiga ah.

## **Racfaannada**

Racfaanku waa codsi lagag rabo Anthem inay go'aankeeda bedesho. Haddii aad doontid inaad racfaan ka gudbisid duudsiinta adeega caafimaad aad leedahay, adiga ama qof aad dooratid baa

kuu codsan karaa racfaankaaga, muddo 60 casho gudeheed oo ka soo wareegtay ogeysiiska waraaqda go'aanka. Adiga, qof aad u dooratid in uu adiga ku matalo, ayaa anaga nasoo wici kara warqad inoo diri kara si uu usoo diro rafcaanka. Anagu waxaynu jecelnahay in aad noogu soo dir rafcaankaaga qaab qoraal ah, laakiin waad nasoo wici kartaa si aad rafcaanka ugu samaysid teleefoonka.

Wac lambarka xubinta adeeg bixiyahay ah ee Anthem oo ah 1-855-690-7800 (TTY 711) si aad u gudbisid racfaanka. Wac Adeegyada Xubinka haddii aad u baahan tahay caawimaad laguugu caawiyo dirida rafcaanka. Waxaynu kuu keeni kartaa turjubaan haddii aadan ku hadlin luuqada Ingiriiska.

U dir rafcaankaaga dhinaca:

Central Appeals Processing  
Anthem Health Plans of Wisconsin, Inc.  
P.O. Box 62429  
Virginia Beach, VA 23466-2429

Waxaan kuugu soo diri doonaa warqad kuu sheegaysa in aynu helnay rafcaankaaga gudaha shan maalmood shaqo oo laga joogo marka aynu helno rafcaanka.

Waxaynu ku qaadan doonaa go'aan ku saabsan rafcaankaaga 30 maalmood oo kuwa kalandarka ah gudahooda laga joogo marka aynu helno rafcaanka. Haddii go'aanka aan ku qaadan kari wayno 30 casho, waxa suurtagal ah inaanu codsanno 14 casho oo kale. Haddii ay sidaan dhacdo, waxaynu kuu soo diri doonaa warqad kuu sheegaysa in aynu u baahanahay wakhti dheeraad ah si aynu u gaarno go'aanka iyo weliba xiliga aad naga filan kartid in aad jawaabta naga hesho. Sidoo kale anagu waxaynu kuu sharxi doonaa sababta aynu ugu baahanahay wakhti dheeraad ah. Qof aanan ku lug lahayn go'aankii hore ee la gaaray aaya dib u eegid ku samayn doona rafcaankaaga. Waxaynu kuu soo diri doonaa warqad lagu xalinayo rafcaanka. Warqadan waxay:

- Kuu sharxi doontaa rafcaankaaga.
- Kuu sheegi doontaa qofka helay rafcaankaaga.
- Kuu sheegi doontaa go'aankeena ugu dambeeya ee ku saabsan rafcaankaaga.
- Kuu sheegi doontaa sida loo codsado dhagaysi gobol cadaalad ah.
- Kuu sheegi doontaa sida loogu diro fayl cabasho qofka gobolka gacanta ugu haya arrimaha dulmiga ah.

## **Assshkatooyinnka iyo racfaannada dadajisan**

Haddii dib u dhicid ku dhaca daaweynta ay gelin karto halis khatar ah caafimaadkaaga, fadlan uga wac Adeegyada Xubinka sida ugu dhakhsiyaha baddan ee ugu suurtogalka ah lambarkan

1-855-690-7800 (TTY 711). Wuxaad naga codsan kartaa in aynu u socod siino cabashadaada ama sheegashadaada isla markiiba. Waxaynu ka jawaabnaa mushkiladaha u baahan in daryeelka loogu helo isla markiiba gudaha 48 saacadood. Waan kusoo wici doonaa ama waxaynu kuu soo diri doonaa warqad ku qorantahay go'aankeena gudaha 48 saacadood oo laga joogo marka aynu helno rafcaankaaga ama cabashadaada la dedejiyaya. Agaasime caafimaad ayaa dib u eegid ku samaynaya codsashooyinka loogu talogalay rafcaanada iyo cabashooyinka dhakhsaha ah. Haddii agaasimaha caafimaad u maleeyo in sugitaan la sugo 30 maalmood oo kalandar ah in aysan wax dhibaato ahi u gaysanaynin caafimaadkaaga, waxaynu warqad kuugu soo diri doonaa gudaha labbo maalmood shaqo. Warqadu waxay kuu sheegi doontaa in aynu ugu dhammayn doono rafcaankaaga ama cabashadaada sida ugu dhakhsiyaha baddan ee aynu awoodno 30 maalmood oo kuwa kalandarka ah gudahooda. Sidoo kale anaga waxaynu isku dayi doonaa in aynu kusoo wacno si aynu kuugu sheegno go'aankeena.

Wuxaad sii wadan kartaa in aad qaadatid isla adeegyada daryeelka caafimaadka inta aad sugaysid xalinta rafcaankaaga haddii aad ku codsatid rafcaanka gudaha wakhtiga saxda ah. Hadhowna waxaad ku khasbanaan doontaa in aad bixisid lacagta loogu talogalay daryeelka xiriirka la leh rafcaankaaga haddii go'aanka u dambeeya uusan ahayn mid adiga maslaxadaada ah.

Kuulamo dhaqmi doono si dadka kale ka duwan haddii aad dirtid fayl cabasho ama rafcaan ah. Dheefahaaga daryeelka caafimaadka isma bedeli doonaan.

## **Gubinta ashkatada ama racfaanka ka baxsan Anthem**

Haddii aad doonaysid inaad kala hadashid mushkiladda cid ka baxan Anthem, wac lambarka adeegaha diiwaangelinta ee HMO oo ah 1-800-291-2002. adeegaha diiwaangelinta ee HMO waxa uu awoodikaraa inuu xalliyo mushkiladdaad ama inuu qoro ashkato rasmi ah oo ku socota barnaamijyada Anthem ama BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI.

Si aad ugu dirtid cabasho barnaamijyada BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI, u qor dhinaca:

BadgerCare Plus and Medicaid SSI  
Managed Care Ombuds  
P.O. Box 6470  
Madison, WI 53716-0470  
1-800-760-0001

Laguulamo dhaqmi doono si ka duwan xubnaha kale haddii aad dirtid fayl cabasho ama sheegasho ah. Dheefahaaga daryeelka caafimaadka isma bedeli doonaan.

Xaq waxaad u leedahay inaad racfaan dalbatid, haddii aad dareentid in Anthem ay ku duudsiisay, koobtay, dhintay, raajisay, ama hakisay adeegyada aad xaq u leedahay. Rafcaanka waa in la gudbiyaa ka hor muddo aan dhaasanay 45 caso, kadib markaad ogeysiiska sheegaya in adeegaagi lagu duudsiiyay, la koobay, la dhimay, la raajiyay, la hakiyay, ama la joojiyay. Racfaanka waxaad ugudbin kartaa HMO, waaxda iyo/ama State of Wisconsin, Division of Hearings and Appeals (DHA) haddii aad aaminsanthay in Anthem ay ku duudsiisay, koobtay, dhintay, raajisay, ama hakisay adeegyadaadi. Haddii aad samaysid rafcaan kahor taariikhda dhaqan galka,

waxaa dhici karta adeega in uu sii socdo. Wuxaad u baahnaan kartaa in aad bixisid qiiimaha adeegyada haddii go'aanka dhagaysiga uusan ahayn mid adiga maslaxadaada ah.

Haddii aad doonaysid dhagaysi cadaalad ah, u dir codsi qoran dhinaca:

Department of Administration  
Division of Hearings and Appeals  
P.O. Box 7875  
Madison, WI 53707-7875

Dhagaysiga waxaa qabban doona qaaliga sharciga maamulka ee jooga gobolka meesha aad ku nooshahay. Wuxaad xaq u leedahay in uu qof kugu matalo meesha dhagaysiga, ama wuxaad keensan kartaa saaxiib ku caawiya. Haddii aad u baahan tahay isku hagaajino khaas ah oo loogu talogalay naafada ama turjumaada luuqada, fadlan wac 1-608-266-3096 (codka) ama 1-608-264-9853 (dhagaysiga diciifka).

Laguulama dhaqmi doono si ka duwan xubnaha kale maadaama aad codsatay dhagaysi maxkamad cadaalad ah. Dheefahaaga daryeelka caafimaadka lama saamayn doono.

Haddii aad u baahanthay in lagula qoro codsi fadhi dhagaysi cadaalad leh, fadlan wuxaad la xidhiidhaa lambarka cadaalad ilaaliyaasha BadgerCare Plus ama Medicaid SSI oo ah 1-800-760-0001 or the ama lambarka adeegaha diiwaan galinta ee HMO oo ah 1-800-291-2002.

## **Ashtakooinka Xuquuqda muwaadinnimada**

Anthem waxay ceymis u fidisa BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI oo ceymiya adeegyada loo qabto giddi dadka xaq u leh, iyadoon la eegayan da'da, isirka, xaaladda jidhkooda, noocooda jinsiga ah, dalka ay ka soo jeedaan, guurkooda iyo la'aantii, in la xidhay ama dabiile yahay ama ka qaybgalka ciidanka

Giddi ahaan dadka iyo hay'adaha la xidhiidhta Anthem ee u gudbiya ama talo bixiya xubnaha adeegyada, waxay u dhaqmayaan isla sidan la xusay oo ku socota xubnaha oo dhan.

Haddii aad aaminsantahay in xuquuqahaaga lagu xad gudbay, wuxaad u diri kartaa fayl cabasho adiga oo:

- Ka waca Adeegyada Xubinka telefoonka lacag la'aanta ah lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711) ama
- Noo soo dira warqad si aad noogu sheegtid waxyaabaha ku saabsan mushkilada. U dir warqadaada dhinaca:

Central Appeals Processing  
Anthem Health Plans of Wisconsin, Inc.  
P.O. Box 62429  
Virginia Beach, VA 23466-2429

Wuxaad u xarayn kartaa ashtako ku saabsan xuquuqda muwaadinnimada U.S. Department of Health and Human Services, Office for Civil Rights:

- Adigoo adeegsanaya internetka Office for Civil Rights Complaint Portal, available at <https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf>
- Qaab boosto ama telefoon halkan:

U.S. Department of Health and Human Services  
 200 Independence Ave. SW  
 Room 509F, HHH Building  
 Washington, DC 20201

1-800-868-1019, 1-800-537-7697 (TDD).

Foomamka cabashooyinka waxaad ka heli kartaa <http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html>.

## **Teknoloojiayda cusub and daawaynta**

---

Midkaan waa wakhti aad ugu xiiso baddan daryeelka caafimaadka. Waxaa jira marwalba daaweyn cusub. Anthem waxay samaysaa hawl muraajaco joogto ah oo loogu talogalay tnikoloojiyada cusub ama isticmaalo cusub oo loo adeegsado tnikoloojiyada hadda taala Koox takhaatiir ah, takhasuslayaal iyo agaasimayayaal caafimaad ayaa go'aansanaya haddii daaweyntu:

- Tahay mid laga oggolaaday dhinaca dowlada.
- Ay ku muujisay, daraasad la isku halayn karo, sida ay u saamayso bukaanada.

Waxaynu nahay booska ugu sareeya ee daaweynta caafimaadka cusub iyo nidaamyada hawsha loo sameeyo wax walbana waxaynu ku haynaa cusboonaysiin ama waxaynu samaynaa haddii loo baahdo siyaasado caafimaad.

## **Xuquuqdaada iyo mas'uulayadhaaga**

---

### **ka war haynta barnaamijka dhiirigalinta takhtarka iyo barnaamijka tayo xoojinta**

Waxaad xaq u leedahay in aad weydiisid haddii aynu la leenahay ballamo maaliyadeed khaas ah takhtaradeena kuwaas oo saamayn kara isticmaalida wareejinada iyo adeegyada kale ee ay dhici karto in aad u baahatid. wac lamabarka adeega xubnaha oo ah 1-855-690-7800 (TTY 711) si aad u codsatid xogag ku saabsan takhtarkeena kharash siintiisa.

Sidoo kale waxaad naga codsan kartaa in aynu kuu soo dirno macluumaad ku saabsan barnaamijkeena Horumarinta Tayada (QI). Barnaamijkan waxaa loogu talogalay in uu:

- Qiimeeyo oona horumariyo qorshaheena caafimaadka.
- Daba galu si uu u oggaado sida aad ugu faraxsantahay bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP).
- Daba galu si uu u oggaado sida aad noogu faraxsantahay.
- Iisticmaalo wixii aynu baranay si aynu u samayno qorshe lagu wanaajinayo adeegaheena.
- Fuliyo qorshaheena si looga dhigo adeegyada daryeelka caafimaadka kuwo wanaagsan.

Waxaad wici kartaa Adeegyada Xubinka si aad u heshid macluumaad ku saabsan barnaamijka iyo warbixinada horumarka ee ku saabsan ujeeddooyinkeena horumarinta.

## **Inaad ka war haysid shahaadadha takhtarka**

Waxaad xaq u leedahay in aad heshid macluumaadka ku saabsan takhtaradeena, ay ku jirto waxbarashada takhtarka, shahaado guddi iyo dib u xaqijin. Kasoo wac Adeegyada Xubinka lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711) si aad u heshid macluumaadkan.

## **Qorshe hore, dardaaran ama wakaalad xagga daryeelka caafimaad**

Adiga waxaad xaq u leedahay in aad:

- Aad qaadatid go'aanada ku saabsan daryeelkaaga caafimaadka.
- Aqbashid ama diidid caafimaadka ama daaweynta qaliinka.
- Qorshe iyo amar ku saabsan noocyada daryeelka caafimaadka aad heli kartid mustaqbalka haddii aad noqotid in aadan awoodin in aad sheegtid waxyaabaha aad jeceshahay.

Waxaad u sheegi kartaa takhtarkaaga waxyaabaha aad jeceshahay adiga oo buuxiya amarka rasmiga ah, dar-daaran ama awooda qareenka ee loogu talogalay daryeelka caafimaadka. Si aad u heshid foomamka aad u baahantahay, weydiiso takhtarkaaga ama booqo boggaan internetka ah [www.dhs.wisconsin.gov/guide/end-life-planning.htm](http://www.dhs.wisconsin.gov/guide/end-life-planning.htm).

Waxaad xaq u leedahay in aad sidatid amarka rasmiga ah ee qoran si aad u sheegtid waxyaabaha aad jeceshahay ee ku saabsan adeegyada daryeelkaaga caafimaadka haddii aad noqotid qof aan awoodin in uu wax sameeyo. Waxaad ku qori kartaa noocyada daryeelka aad rabtid ama aadan rabin in aad qaadatid. Tusaale ahaan, dadka qaar ma doonayaan in lagu xiro mashiino taakulonolosha ah marka ay galaan koomad. Midaan waxaad ku sheegi kartaa amarkaaga rasmiga ah. Adeegahaaga guud ee daryeelka caafimaad (PCP) waxa uu ku diiwaan galing qorshahaaga xogtaada caafimaad. Qaabkaasi, takhaatiirtaadu waxay oggaan doonaan waxa aad rabtid. Sidoo kale waxaad magacaabi kartaa dadka qaar, sida xaaskaaga/ninkaaga, sida qofka go'aansanaya waxyaabaha ku saabsan daryeelkaaga caafimaadka haddii aadan awoodin in aad qaadatid go'aanadaasi. Waxaad burin kartaa amarka rasmiga ah waqt kasta.

Anthem waxay leedahay siyaasado qoran oo khuseeya xuquuqahaaga si loo sameeyo amarka rasmiga ah. Anthem ma go'aansanayso sida loo bixiyo daryeelka ama loo sameeyo midab takoor kusalaysan haddii aad samaysay ama aadan samaynin amarka rasmiga ah. Anthem uma xadidayso isticmaalka amarka rasmiga ah in uu yahay arin damiir ah. Waxaa khasab kugu ah in aad kala hadashid waxyaabaha ku saabsan amarkaaga rasmiga ah takhtarkaaga si loo oggaado haddii mid ayaga kamid ahi uu leeyahay diidis anshax oo ka celinaysa fullinta amarkaaga rasmiga ah sabab kasta oo ay noqoto. Wac Adeegyada Xubinka haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan dar-dhaaranka.

Waxaad xaq u leedahay in aad u dirtid fayl cabasho DHS Waaxda Adkaynta Tayada haddii waxyaabaha aad jeceshahay ee ku saabsan amarkaaga rasmiga ahi, dar-dhaarankaaga ama awoodaada qareenka aanan la raacin. Waxaad codsan kartaa caawimaad laguugu caawiyo dirida faylka cabashada. La xiriir takhtarkaaga si aad u oggaatid macluumaad dheeraad ah.

## **Xaqqa aad u leedahay xogahaaga caafimaad ee diiwaangashan**

Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid nuqulo ku saabsan diiwaanadaada caafimaadka kuwaas oo uu ku siyo takhtarka(takhaatiirtaada). Waxaynu kugu caawin karnaa in aad heshid nuqulo ku saabsan diiwaanadaan. Fadlan wac lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711) si aad u heshid caawimaad. Fadlan ogsoonoow in ay dhici karto in aad lacag ku bixisid si nuql uga samaysatid diiwaanadaada caafimaadka. Wuxuu aad sixi kartaa maclummaadka aan sixiixa ahayn ee ku qoran diiwaanadaada caafimaadka haddii uu takhtarkaagu oggolaado sixitaanka in la sameeyo.

## **Diiditaannu ku xidhan akhlaaqda iyo diinta**

Waxay ka war galinysa HMO xubnaha haddii adeegyo ceymiska Medicaid ku jira iyo faa'idooyinkoodo oo aan laga heli karin HMO sababo ku xidhan in looga soo horjeedo sababo akhlaaqeed ama diineed. Anthem waxay ka wargalinaysa xubnaha sida loo heli lahaa adeegyadaa gobolka gudihiisa guud ahaan

## **Xuquudaada xubinnimo**

Maadaama aad tahay xubin ka tirsan Anthem, waxaad xaq u leedahay in aad:

- Inaad lahaatid turjumaan kula socda markaad helaysid adeegyada ay ceymisay BadgerCare Plus iyo/ama Medicaid SSI.
- Hel maclummaadka lagu sheegay buuggyarahaan Xubinka midkaas oo ku qoran luuqad kale ama ah qaab kale.
- Hel adeegyada daryelka caafimaadka kuwaas oo lagu bixiyay sharciga gobolka iyo federaalka. Dhammaan adeegyada ceymiska kujira waa in aad heshid oona geli kartid. Marka ay caafimaad ahaan munaasab u tahay, adeegyada waa in lagu helo gudaha 24 saacadood maalintii, todobada maalin todobaadkii.
- Hel maclummaad ku saabsan doorashooyinka daaweynta, ay ku jirto xaq aad u leedahay in aad codsatid ra'yi labbaad.
- Aad qaadatid go'aano ku saabsan daryelkaaga caafimaadka.
- Laguula dhaqmo si sharaf iyo xushmad leh.
- Ahaatid qof xur ka ah wax kasta oo xakamayn ama goyn ah oo loo isticmaalo sida qaab awood, xakamayn, joojin ama aargoosi.
- Xor baad u tahay inaad dhaqan galiso xuquuqdaada adigoon la kulmeen isbedel xagga kula dhaqankaan ka iman kara HMO ama shabakaddeeda ee adeegyasha.
- Isbedl ku imaada HMOs sabab la'aan iyada oo lagu jiro 90-ka casho ee ugu horreeya isku diiwaan gelinta Anthem.
- bedelidda HMO, sabab la'aan, haddii gobolku ku soo dajiyay ganaax ama xakamayn muddaysan Anthem.
- Xog ka hel Anthem ku sabsan isbedel kasta oo weyn ugu yaraan 30 casho ka hor maalainta uu isbedelku dhaqan galayo.
- Ugala hadashid si xur iyo khaas ah takhtarkaaga waxyaabaha ku saabsan dhammaan doorashooyinkaaga daaweynta.
- Naga filatid in aynu ka dhigno maclummaadkaaga caafimaadka kuwo khaas ama sir ah, intiiba ay raacayso sharciyada federaalka iyo gobolka iyo siyaasadaheena khususiyada.

- Heshid maclumaadka aad u baahantahay si aad ugaga faa'ideysatid sida ugu fiican qorshahaaga caafimaadka una wadaagtid fical-celintaada ama ra'yigaaga. Midaan waxaa kamid ah maclumaad ku saabsan:
  - Shirkadeena.
  - Takhtaradeena iyo bixiyayaal daryeel caafimaad kale.
  - Adeegaheena.
  - Xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadaha.
- Samaysid soo jeedino ku saabsan xuquuqaha xubinka ururka iyo siyaasada mas'uuliyadaha.
- Ashtako soo sameey ama xarayso rafcaan ku saabsan qorshaha daryeelkaaga caafimaad, haddii ay wax u dhimayso daryeel kasta iyo adeeg ceymisan iyo faa'ido aad heli jirtay.

## Mas'uuliyaaaddada xubin ahaan

Sifada xubinnimada ee Anthem member, waxay ku saaraysaa mas'uuliyyadahan:

- Samaysatid ama bedeshid ballamaha.
- Tagtid ballamaha wakhtiga loogu talogalay.
- Wacdid bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) haddii aadan imaan karin ballanta ama aad soo daahaysid.
- U isticmaashid qolka xaalada caafimaadka deg-degga ah kaliya xaaladaha caafimaadka sida dhabta ahi deg-degga u ah.
- Bixi qiimaha adeeg kasta oo aan ceymiska BadgerCare Plus ama Medicaid SSI ku jirin.
- Na siisid anaga iyo takhtarkaaga maclumaadka aad u baahantahay si ay kuugu caawiyaan in aad heshid daryeelka ugu wanaagsan ee ugu suurtogalka ah.
- Samaysid waxyaabaha kugu caawinaya in aad ahaatid qof caafimaad qabba kana fogaatid waxyaabaha kaa dhigaya in aad xanuunsatid.
- Raacdidd qorshaha caafimaadka aad kula heshiisay takhaatiirtaada.
- Fahantid mushkiladahaaga caafimaadka kulana shaqaysid takhaatiirtaada sidii aad ugu heshiin lahaydeen qorshaha daaweynta.
- Noo sheegtid iyo gobolkaaga ama wakaaladaada Masruufka Dakhliga qabiileed haddii:
  - Aad guurtid.
  - Bedeshid lambarkaaga telefoonka.
  - Ay isbedelaan tirada dadka ku nool gurigaaga.
  - Aad qabtid ceymis kale.
  - Aad qaadid uur.

## Siyaasadda sirnimada

Anthem xaq waxay u leedahay inay maclumaad ka hesho cid kasta oo daryeel kuu fidisa. Waxaynu u isticmaalnaa maclumaadkan si aynu u bixino lacagta una maarayno daryeelkaaga caafimaadka. Maclumaadkan waxay ahaanaysa sir ka dhexeeya adiga, fidiyaha daryeelka caafimaad, iyo Anthem, haddii aanuu sharcigu si kale odhanin. U laabatid Ogeysiiska Hawlaha la sameeyo ee Sirnimada (NOPP) si aad u akhrisid waxyaabaha ku saabsan xaqaa aad u leedahay sirnimada. Ogeysiiskan waxaa laga heli karaa dhammaadka buug-yaraha xubinka. Haddii aad jeceshahay nuqlu kale oo ku saabsan ogeysiiska, fadlan ka wac Adeegyada Xubinka lambarkan 1-855-690-7800 (TTY 711).

## Ogaysiiska maamulka adeegsiga

Go'aamma maamulka adeegsiga oo dhan (UM) waxay ku tiirsanyihiin baahiyaha caafimaad ee xubinka iyo faa'idooyinka loo fidiyay. Siyaasadda Anthem ma taageerayso in la dhimo adeegyadmarka la eego haga go'aan qaadashada ee maamulka adeegsiga UM. Takhaatiirta iyo kuwa kale ee ku lug leh go'aanada isticmaalida maamulida kuma qaataan nooc kasta oo abaalmarin ah diidista daryeelka ama ceymis kujirida. Go'aanada ku saabsan shaqaalaynta, dalacinta ama joojinta takhtarada ama shaqaale kale ma ahan kuwo ku dhisan suurtagalmimada ama u arkida suurtagalmimada ay taageeraan, ama loogu talogalay in lagu taageero, diidista dheefaha.

## Sheegidda xubinka ama takhtarka qish, baabiin ama si xun u adeegsi sameeya.

Haddii aad u malaysid in xubin qorshe ama takhtar uu gaystay kхиyaano, si khalad ah u isticmaalay ama xad gudub sameeyay, waxaad waajib sharci iyo xaqba u leedahay in aad soo sheegtid. Si aad usoo sheegtid kхиyaano, si khalad ah u isticmaalida ama xadgudubka, raadso dhammaan faah-faahinada aad awoodid. Waxed si toos ah ugu sheegi kartaa takhtarada ama xubnaha qorshahaaga caafimaadka adiga oo:

- Diridda waraaq warwar muujin ah oo sir ah [mss.anthem.com/pages/wfa.aspx](http://mss.anthem.com/pages/wfa.aspx).
- La xidhiidhidda Anthem Medicaid qaybta dabagalka gaarka ah (MSIU)
  - Qaab telefoon: 1-866-847-8247 (TTY 1-866-494-8279)
  - Iimayl ahaan: MedicaidFraud@anthem.com
- Ka waca Khadka marwalba shaqeeyaa ee Khiyaanada ee DHS lambarkan 1-877-865-3432.
- Adeegsiga internetka [www.reportfraud.wisconsin.gov](http://www.reportfraud.wisconsin.gov).
- U qora dhinaca:

Department of Health Services  
Division of Quality Assurance  
Office of Caregiver Quality  
P.O. Box 2969  
Madison, WI 53701-2969

Haddii aad soo sheegtid takhtar, sheeg:

- Magaca, cinwaanka iyo lambarka telefoonka takhtarka.
- Magaca iyo cinwaanka xarunta.
- Lambarka takhtarka ama xarunta ee Medicaid (haddii aad garatid).
- Nooca takhtarka.
- Magacyada iyo lambarada telefoonka markhaatiyaasha kale ee nagu caawin kara in aynu baarno xaqiiooyinka.
- Taariikhaha dhacdooyinka.
- Qoraal kooban oo ku saabsan waxa dhacay.

Haddii aad soo sheegtid qof qaadanaya dheefaha, sheeg:

- Magaca qofka.
- Taariikhda dhallashada qofka iyo lambarka dammaanada bulshada (haddii aad haysatid).
- Magaca magaalada ee uu qofku ku nool yahay.

## Xuquuqdaada ee muwaadinnimada

Anthem waxay u fidisaa adeegyo ceymisan cid kasta oo xubin ka ah xaq u leh iyadoon eegayn:

- Da'da
- Midabka
- Naafonimada
- Asalka dhallashada
- Isirika
- Jinsiga

Dhammaan adeegyada ceymiska ku jira ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah waa kuwo la heli kara waxaana loo siinaya dhammaan xubnaha qaab isku mid ah. cid iyo ha'ad kasta oo xidhiidh la leh Anthem oo lagu wareejiyo xubnaha si loogu adeego, waxay ka simanyihiin inay ula dhaqmaan si siman giddi.

## Qeexitaanno

---

Halkan waxaa ku qoran qaar kamid ah ereyada ama weedhaha lagu isticmaalay buuggaan:

### Adeegyada daryeelka caafimaad ee dhimirka

Daryeelka iyo adeegyada la bixiyo si loo oggaado haddii qof uu qabbo xanuun dareen ama maskax, sidoo kale daaweyn kasta oo xanuunkaasi ku saabsan. Adeegyadaan waxaa bixin kara takhtarka cudurka dhimirka, takhtarka cilmi nafsiga, shaqaale bulshadeed caafimaad rukhsad ama shahaado haysta ama daaweeye qoys iyo guur. Noocyada daaweynta waxaa kamid ah balse aanan ku ekayn:

- Qoraal takhtar daawooyin ah.
- Baxnaanis.
- Daryeel lagu bixiyo cusbitaal qaabilsan cudurka maskaxda.

### Adeegyo tijaabo ama ku eegid ah

Daaweyn, cilaaj, habraac, saad, qalab ama daawo kasta ee aanan loo oggolaanin in ay tahay mid faa'iido leh ama loo aqbalin in ay tahay daryeel caadi ah.

### ashtako

Sheegida ku qanacsanaan la'aanta aadan ku qanacsanayn qorshahaaga caafimaadka ama takhtarka. Cabashadu waxay noqon kartaa cabasho ama rafcaan haddii aad noogu soo dirtid qaab qoraal ah. Cabashadu waxay ka koobnaan kartaa:

- Mushkiladaha helida sida in aadan awoodin in aad heshid adeega, daaweynta ama daawada aad u baahantahay.
- Qorshahaagu diidayo adeeg aad u baahan tahay asaga oona dhahaya in adeegaasi uusan ahayn mid caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah.
- In aad sugtid muddo dheer ballanta.
- In aad heshid daryeel liita ama in laguula dhaqmo si xun.
- In aanan dib laguugu celinin lacagta aad ku bixisid xaalada caafimaadka deg-dega ah ama daryeelka deg-dega ah midkaas oo aad ku khasbanayd in aad bixisid lacagtiisa.
- Heshid warqad biil lacag aad aaminsan tahay in aysan ahayn in aad lacagteeda bixisid.

## **Caafimaad ahaan lagama maarmaan ah**

Adeegyada daryeelka caafimaadka ama qalabka:

- Loo bixiyo si waafaqsan heerarka hawl samaynta xirfad ahaan loo aqoonsaday.
- Arrin caafimaad ahaan looga tixgeliyo dhinaca takhtarkaaga in ay muhiim tahay.
- Loo bixiyo nooca saxda ah, qalabka iyo heerka adeega halka la tixgelinayo khatarada, dheefaha iyo doorashooyin kale.

## **Cabasho**

Bayaan qoran oo ku saabsan ku qanacsanaan la'aanta midaas oo adiga (ama qofka ku soo qoraya adiga magacaaga) uu sameeyo. Cabashooyinka waxay la xiriiraan wax kasta laakiin aanan ahayn go'aanada ku saabsan dheefaha. Cabashooyinku waxay noqon karaan kuwo ku saabsan:

- Tayada daryeelka ama adeegyada la bixiyay.
- Takhtar ama shaqaale kuula dhaqmay si xun ama si aan xushmad lahayn.
- In aanan la xushmaynin xuquuqahaaga xubinimo.

## **cusbitaal**

Meel lagu daaweyyo dadka xanuunsan ama dhaawaca ah. Cusbitaaladu waxay siinayaan bukaan-socodka iyo bukaan jiifka daryeel caafimaad. Xubinada shaqaalaha cusbitaalka waxay u shaqeeyaan si ay u oggaadaan una daaweyyaan mushkiladaha ayaga oo isticmaalaya qaliin iyo adeego noocyoo kale ah. Cusbitaalka ku yaalla Wisconsin waa in uu rukhsad ka haystaa dhinaca gobolka Wisconsin oona laga aqoonsado dhinaca Guddiga Wada jirka aqoonsashada ururada daryeelka caafimaadka ayaa noqon kara:

- Cusbitaalka daryeel wanaagsan.
- Cusbitaalka cudurka dhimirka ah (caafimaadka maskaxda)
- Cusbitaalka si weyn ugu shaqeeya daaweynta caadaysiga khamrada ama ku xad gudubka daroogada (daroogo).

Midaan kamid ma ahan xarunta si weyn u ah guri nasiino, guro kalkaalin ama guri loogu talogalay dadka waayeelka ah. Sidoo kale kamid ma ahan xarun kasta oo kalkaalinta xirfadysan ah midaas oo noqon karta qayb kamid ah cusbitaalka.

## **Daryeelka bukaanka la jiifiyo**

Caadi ahaan midaan waa marka ay khasab kugu noqoto inaad joogtid habbeenkii cusbitaalka ama xarun daryeel caafimaad kale si aad ugu qaadatid daryeel caafimaad.

## **Daryeelka bukaanka socotada ah**

In lagu helo daryeel caafimaad cusbitaalka ama xarun daryeel caafimaad kale ayada oo aan jirin in uu habbeenkii meesha la seexdo.

## **Daryeelka dhakhsaha ah**

waa daryeelka laguu qabto ee aan lala sugi karin ballan lala galoo takhtarkaaga daryeelka guud kuu fidiya (PCP). Daryeelka deg-degga ah wuxuu ka celinaya caafimaadkaaga in uu ka sii xumaado xanuunka, dhaawaca ama xaalada aadan filanaynin darteeda. Dhibaatadu ma ahan mid aad halis u ah si ay ugu baahato daryeelka qolka xaalada caafimaadka deg-degga ah. Xalaadahaasi waxay u kala duwanyihii siyaabaha laf jabta ilaa dhago xanuunka.

## **Faa'idooyinka/Adeegayada**

Adeegyada, qalabka iyo daawooyinka aad ku qaadan kartid qorshahan caafimaadka. Kuwaan kaliya waxaa loo bixin doonaa dhinaca Anthem ama gobolka haddii ay caafimaad ahaan u yihiin kuwo lagama maarmaan ah uuna ku siiyo takhtarka ku jira qorshaheena. Adeegyada qaar waxay u baahanyihiin in hore looga soo qaadto aqbalidda Anthem. Xittaa haddii ay adeegaydu ku xusanyihiin buugan, waa inaad la raaacda shuruudaha si kharshkeeda lagaag bixiyo xagga Anthem ama gobolka.

### **Daryeel Fidiye**

Daryeel fidiyuhu waa qof ku takhasusay daryeelka caafimaad sida hoos ku xusan oo ogolaashiyo ka haysta Wisconsin Department of Health Services si uu ugu fidiyo daryeel caafimaad dadka ay kharshka u qabto BadgerCare Plus iyo/ama Medicaid SSI:

- Takhtar
- Cusbitaal
- Xarun kalkaalin xirfad leh
- Xirfadle caafimaad kale oo rukhsadaysan
- Xarun caafimaad kale oo rukhsadaysan
- Wakaalad caafimaad guri kale oo rukhsadaysan

### **Fidiye daryeel ceymiska**

Takhtar, cusbitaal, xarun, farmashi, sheybaar ama daryeel caafimaad xirfadle midkaas oo anaga qandaraas nagula jira wakhtiga aad qaadatid dheefaha. Bixiyahaan waa mid ku jira qorshaheen.

### **Fidiye daryeel ee guud (PCP)**

Takhtar ama xirfadle caafimaad kale midkaas oo ah ishaada ugu muhiimsan ee helida daryeelka. Bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah wuxuu oggaan doonaa adiga iyo caafimaadkaaga asaga oo adiga kula kulma marka aad caafimaadka qabtid (booqashooyinka-caafimaadka) ama marka aad qabtid arrin caafimaad midaas oo aan ahayn mid deg-deg ah. Bixiyaha daryeelka aasaasiga ah wuxuu noqon karaa mid kasta oo kamid ah noocyada takhaatiirta qanadaraaska ugula jira Anthem si ay u siiyan daryeelka aasaasiga ah xubnaha:

- Takhtarka carruurta (wuxuu daryeelayaa ilmaha iyo carruurta)
- Takhtar guud ama qoys (wuxuu daryeelayaa ilmaha, carruurta iyo dadka waaweyn)
- Takhtarka cudurada hoose (wuxuu daryeelayaa dadka waaweyn)
- sida takhtarka dhallaanka ama taranka, kalkaaliso umulisa ah (haweenayda uun dryeela)
- Kalkaaliso takhtar sare
- Kaaliye takhtar

### **Hagaha fidiyaasha**

Liis ku saabsan takhaatiirta, cusbitaalada, xarumaha iyo xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee kale kuwaas oo kusoo biiray Anthem si ay u siiyan adeegyada ceymiska kujira xubinadooda.

### **Lacag la bixinta (Copay)**

Lacag bixinta ay dhici karto in uu takhtarkaagu ku weydiisto in aad bixisid marka adeeg ceymis kujira lagu siiyo.

## **Meel degmooyinka adeega laga heli karo ka baxan**

Gaadiid loogu talo galay xaaladaha degdega ama dhkhsaha loo adeegsado marka laga baxo deegaammada adeega Anthem ka hawl galo. Noocyadaan adeegyada daryeelka deg-degga ah iyo xaalada caafimaadka deg-degga ah lama sugi karo inta uu xubinka dib ugaga soo noqdo meesha adeega lagu bixiyo.

## **Ogolaanshaha hor dhac ah**

Oggolaanshaha aynu ku siino kahor inta aadan qaadan adeega. See the section called *Preapproval* for more information.

## **racafaanka**

Codsi anaga la inooga codsanayo in aynu dib u eegno go'aanka aynu samaynay ee ku saabsan dheefahaaga daryeelka caafimaadka.

## **takhasusle**

Waa takhtar ka mid ah daryeelka (Anthem) oo fidiya adeeg ku saabsan farsamdiisa. Adigu uma baahnid wareejin si aad u aragtid qaar kamid ah takhasuslayaashaan.

## **Takhtar ceymiska ka diiwaan gashanayn**

Waa takhtar aan heshiis la saxeexin Anthem si uu kuugu gudbiyo adeegyada iyo faa'idooyinka. Takhtarku ma ahan qayb kamid ah qorshahaaga.

## **Talo hor dhaca ah**

Amarka rasmiga ah waa tilmaan shariyeed oo qoran midaas oo sheegaysa waxyaabaha aad jeceshahay ee ku saabsan adeegyadaada daryeelka caafimaadka haddii aad noqotid qof aan awoodin in uu wax sameeyo. Qaar kamid ah tusaalooyinka amarada rasmiga ah waxay yihin:

- Dar-daaran.
- Awoodda qareenka.

sharciga gobolka Wisconsin waxa uu kuu fasaxayaa inaad go'aamo ka lahaatid daryeelka caafimaad ee aad helaysid, oo aad diidid daaweynta. Wuxaad eegtaa qaybaha *Advance directive, living will or power of attorney for health care* si aad u heshid xog dheeri ah.

## **Xaalad caafimaad xaga dhimirka oo degdeg ah**

Mushkilad maskax midaas oo dhibaato u keeni karta nafsadaada ama dadka kale.

## **Xaaladaha degdeg ah**

Xaalad caafimaad ama cudurka dhimirka ah midaas oo u baahan daryeel degdeg ah maadaama ay:

- Gelin karto caafimaadkaaga (ama caafimaadka ilmahaaga aanan weli dhalan) khatar halis ah.
- U keeni karto diciifnimo shaqada jirka ah.
- Ukeeni karto diciifnimo halis ah oo qayb jirka ama unugga ah.

## **Xarun kalkaalin oo xirfadaysan**

Meel daryeelaysa dadka qabba xanuuno daba dheeraada oona siinaya daryeel kalkaalil muddo-dheer ah, baxnaanis iyo adeego kale oo ah 24 saacadood maalintii.

### **Xubinka**

Waa qof ku biiraya oo ka faa'idayaa Ceymiska caafimaad Anthem si uu u helo daryeel caafimaad. Buuggaan, xubinka waxaa loogu yeeraa "adiga."

OGAYSIISKAN WUXUU SHARXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO OONA LOO SII DEYN KARO IYO SIDA AAD KU HELI KARTID MACLUUMAADKAN KHUSEEYA DHEEFAHA CAAFIMAADKAAGA. FADLAN SI TAXADAR LEH DIB-U-EEGIS UGU SAMEE.

## **Ogeysiiska HIPAA ee ku saabsan dhaqan galka gaarka ah**

Taariikhda dhaqan-galka asalka ah ee ogeysiiskan waxay ahayd 14ka Abril, 2003. Taariikhda muraajacada ugu dambaysay waxay ku qoran tahay dhammaadka ogeysiiskan.

**Fadlan ogeysiiskan si fiican u akhriso Waxaa uu sheegaya cidda arki karta macluumaadka caafimaad ee ilaashan(PHI). Waxaa uu sheegayaa marka ay waajib tahay in laguwaydiyo ogolaanshahaaga intaan la wadaagin. Waxaa uu sheegayaa goorta la wadaagi karo adigoon ogolayn. Waxaa kaloo uu sheegayaa xuquuda aad u leedahay inaad aragtid ama bedeshid macluumaadkaas.**

Macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga iyo lacagtaada waa kuwo sir ah. Sharcigu wuxuu dhigayaa in aynu ka dhigno macluumaadkaan oo kale, ee lagu magacaabo macluumaadka caafimaadka la ilaaliyay (PHI), kuwo ammaan u ah xubinadeenna. Midaas macnaheedu waxay tahay haddii aad hadda tahay xubin ama haddii aad ahaan jirtay, macluumaadkaagu waa kuwo ammaan ah.

Waxaan macluumaadkaaga ka helnaa hay'adha gobolkaMedicaid iyo Children's Health Insurance Program awgood, marka aad qumani tahay oo aad iska deewaangalisiid adeegeena caafimaad. Sidoo kale waxaynu ka helnaa takhtaradaada, xarumaha caafimaadka, sheybaarada iyo cusbitaalada si ay CAADI u ahaato una bixino daryeelkaaga caafimaadka.

Sharciga federaalka wuxuu dhigayaa in ay khasab nagu tahay in aynu kuu sheegno waxa uu sharcigu dhigayo in aynu samayno si aynu u ilaalino macluumaadka caafimaadka la ilaaliyay (PHI) kuwaas oo anaga la inoogu sheegay, qaab qoraal ama lagu keydiyay kombuyutarka. Sidoo kale anaga waxaa khasab nagu ah in aynu kuu sheegno sida aynu ammaan uga dhigno. Si aynu u ilaalino macluumaadka caafimaadka la ilaaliyay (PHI):

- Warqad (lagu magacaabo jireed ama muuqaal), anaga:
  - Waxaynu xirnaa xafiisyadeena iyo faylasha
  - Jeex-jeexno warqada ay ku qorantahay macluumaadka caafimaadka si aysan dadka kale u arkin
- Ku keydino kombuyutar (lagu magacaabo farsamo), anagu:
  - Waxaynu isticmaalnaa lambar sireed si ay u arkaan kaliya dadka loogu talogalay
  - Waxaynu isticmaalnaa barnaamijyo si aynu u ilaalino nidaamyada
- Isticmaala ama lala wadaago dadka anaga noo shaqeeya, takhtarada ama gobolka, anagu:
  - Waxaynu samaynaa xeerar looga dhigayo macluumaadka kuwo ammaan ah (lagu magacaabo siyaasado iyo nidaamyo hawl)
  - Barnaa dadka noo shaqeeya in ay raacaan xeerarka

### **Goormay sax tahay inaanu adeegsanno ama wadaagno macluumaadkaaga PHI?**

Waxaynu la wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay qoyskaaga ama qof aad dooratid midkaas oo kugu caawinaya ama bixinaya lacagta loogu talogalay daryeelkaaga caafimaadka haddii aad nagu dhahdid waa HAGAAG. Marmar waxaan awoodnaa inaanu isticmaalno oo aan wadaagno ogolaanshaha la'aantii.

- Daryeelkaaga caafimaad awgii

- Si loogu caawiyo takhtarada, cusbitaalada iyo kuwo kale in ay ku siiyaan daryeelka aad u baahan tahay
- **Kharshaka, qalliinnada daryeelka caafimaad iyo daaweynta awgood**
  - Si loola wadaago macluumaadka takhtarada, xarumaha caafimaadka iyo kuwo kale kuwaas oo lacag nagu siiyo daryeelkaaga
  - Marka aynu dhahno in aynu bixinayno daryeelka caafimaadka iyo adeegyada ka hor inta aadan qaadanin
  - Si loo helo qaabab aynu uga dhigi karno barnamijyadeenna kuwo wanaagsan, sidoo kale in la siiyo macluumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay isdhaafsi macluumaad caafimaad loogu talogalay lacag bixinta, hawlaha daryeelka caafimaadka iyo daaweynta. Haddii aanaad doonayn fadla booqo [www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin) si aad xog dheeriya u heshid.
- **Sababo ku xidhan shaqada daryeelka caafimaad**
  - Si loogu caawiyo tifatirayaasha, barnamijyada ka hortagga xadgudubka iyo khiyanada, u qorshaynta, iyo shaqada maalin walba ah
  - Si loo helo qaabab looga dhigi karo barnamijyadeenna kuwo wanaagsan
- **Sababo caafimaadka bulsha awogood**
  - Si loogu caawiyo shaqaalahaa caafimaadka dadweynaha in ay ka celiyan dadku in ay xanuunsadaan ama dhibaato gaarto
- **Dad kale oo ka caawiya ama bixiya daryeelkaaga**
  - Qoyaskaama qof aad dooratat oo kaa caawiya bixinta kharshaka daryeelkaaga caafimaad. Haddii aad noo sheegtid ogolaanshahaaga
  - Qof kugu caawinaya ama bixinaya lacagta loogu talogalay daryeelkaaga caafimaadka, haddii aadan adigu nafsadaada u hadli karin oona adiga kuu wanaagsan tahay

Waa in aynu ku helno OGGOLAANSHAHAAAGA, qaab qoraal ah kahor inta aynaan isticmaalin ama dadka la wadaagin macluumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay (PHI) dhammaan aan ka ahayn daryeelkaaga, lacag bixinta, shaqada maalin walba ah, cilmi-baarlis ama waxyaabo kale oo hoos lagu qoray. Waa in aynu helno OGGOLAANSHAHAAAGA qoran ka hor inta aynaan dadka la wadaagin qoraallada daaweynta cilmi-nafsiga ka ahaada takhtarkaaga kuwaas oo adiga kugu saabsan.

Waa in aad noogu sheegtid qaab qoraal ah in aad doonaysid in aad dib ula laabatid OGGOLAANSHAHAAAGA qoran. Anagu dib uma celin karno wixii aynu isticmaalnay ama dadka la wadaagnay marka aynu helno OGGOLAANSHAHAAAGA. Laakiin waxaynu joojin doonaa isticmaalida ama in aynu dadka la wadaagno macluumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay (PHI) mustaqbalka.

#### **Sababo kale oo aan ku awoodno — ama sharcigu nagu amro — si aanu u isticmaalno macluumaadkaaga PHI:**

- Si loogu caawiyo booliska iyo dadka kale kuwaas oo hubsanaya in ay dadka kale raacaan shariyada
- Si loo sheego xadgudub iyo dayicid
- Si loogu caawiyo maxkamada marka la inaga codsado
- Si looga jawaabo dokumeentiyada shariyed
- Si loo siiyo macluumaadka wakaaladaha caafimaadka ee dibada jooga midaas oo loo siiyo arrimo ah sida tifatirid ama baaritaano

- Si loogu caawiyo caafimaadka sharchiyeed, baariyaanada caafimaad ama agaasimayaal aasid in ay oggaadaan magacaaga iyo sababta keentay dhimashadaada
- Si loogu caawiyo marka lagaa codsado in aad bixisid qaybo kamid ah jirkaaga ujeeddo cilmiyed darteed
- Cilmi-baaris darteeda
- Si looga ilaaliyo adiga iyo dadka kale in ay xanuunsadaan ama si xun dhaawac u gaaro
- Si loogu caawiyo dadka u shaqeeya dowlada shaqooyin khaas ah
- Si loo siiyo maclumaadka magdhowga shaqaalayaasha haddii aad xanuunsatid ama ku dhaawacantid meesha shaqada

### **Waa maxay xuquuqdaado?**

- Wuxaan kartaa in aad aragtid maclumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay (PHI) iyo in aad heshid nuql maclumaadka ku saabsan. Inkastoo, aynaan haysanin dhammaan diiwaanadaada caafimaadka. **Haddii aad doontid noqolka xogtaada caafimaad oo dhan, ka codso takhtarkaaga ama xanaanada caafimaadka.**
- Wuxaan naga codsan kartaa in aynu bedelno diiwaanada caafimaadka aynu hayno ee adiga kugu saabsan haddii aad u malaysid in ay wax khaldan yihii ama wax ka maqan yihii.
- Mararka qaar, wuxaan naga codsan kartaa in aynaan dadka la wadaagin maclumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay (PHI). Laakiin anagu khasab naguma ahan in aynu oggolaano codsigaaga.
- Wuxaan naga codsan kartaa in aynu ku dirno maclumaadka caafimaadka la ilaaliyay cinwaan kale oo aan ahayn midka aynu kaa hayno ama qaab kale. Sidaan waxaan ku samayn karnaa haddii dirida lagu diro cinwaanka aynu kaa hayno uu ku gelin karo khatar.
- Wuxaan naga codsan kartaa in aynu kuu sheegno marwalba dhammaan lixdii sanno ee lasoo dhaafay in aynu la wadaagnay maclumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay (PHI) qof kale. Midaan laguma qorayo wakhiyada aynu dadka la wadaagnay midaas oo ay sabab u tahay daryeel caafimaad, lacag bixin, shaqo daryeel caafimaad maalin walba ah ama sababo kale oo aynaan halkan ku qorin.
- Wuxaan kartaa wakhti kasta nuql warqadeed ku saabsan ogeysiiskan, xitaa haddii aad midaan ku codsatid qaab boosto.
- Haddii aad bixisid lacagta biilka oo dhan ee loogu talogalay adeegga, wuxaan ka codsan kartaa takhtarkaaga in uusan dadka la wadaagin maclumaadka ku saabsan adeegaasi aynu kaa hayno.

### **Maxaa nagu waajib ah?**

- Sharcigu wuxuu dhigayaa in aynu ka dhigno maclumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay (PHI) kuwo sir ah aan ahayn sidii aynu ku sheegnay ogeysiiskan.
- Waxaa khasab nagu ah in aynu kuu sheegno waxa uu sharcigu noo sheegayo in aynu samayno ee ku saabsan sirnimada.
- Waa in aynu samayno waxa aynu ku sheegnay ogeysiiskan in aynu samaynayno.
- Waa in aynu ku dirno maclumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay cinwaan kale ama qaab aanan ahayn boostada caadiga ah haddii aad codsatid sababo macquul ah, sida haddii aad khatar ku sugar tahay.
- Waxaa khasab nagu ah in aynu kuu sheegno haddii ay khasab nagu tahay in aynu dad la wadaagnay maclumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay (PHI) kadib marka aad nagu dhahday qofna hala wadaagin.

- Haddii sharciyada gobolku dhigaan in aynu samayno wax ka baddan wixii aynu halkan ku sheegnay, waxaynu raaci doonaa sharciyadaasi.
- Waxaa khasab nagu ah in aynu kuu sheegno haddii aynu u malayno in macluumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay (PHI) la jabsaday.

### **Waan kula soo xidhiidhi karnaa**

Marka aad na siisid lambarada telefoonkaaga, waxaad oggolaanaysaa in anaga, ay la jirto shirkadaheena na raacsan iyo/ama gadayaasha, ay wici karaan ama qoraal fariin u diri karaan lambarada telefoon kasta oo aad na siisid, ay ku jirto lambarka telefoonka gacanta, ayada oo la isticmaalayo nidaam wicitaan telefoon ootamaatik ah iyo/ama fariin hore-loo duubay. Waxaa kaliya oo aan ku sameynaa midaan sida la xiriirto Xeerka Illaalada Taleefonka Macmiilka (TCPA). Wacitaanada waxay ku ogeysiin kartaa wax ku saabsan dooqyada daaweynta ama faa'idooyinka kale ee caafimaadka iyo adeegyada la xiriiro. Haddii aadan rabin in lagaala soo xiriiro taleefon ahaan, ogeysii wacaha, oo kuulama soo xiriireyno qaabkaan markale. Ama waxaad soo wici kartaa 1-844-203-3796 si aad ugu darterd lambarka taleefonkaaga liiskeena Ha Wicin. Wakhti kasta, waxaad soo wici kartaa lambarka ku qoran kaarkaaga Aqoonsiga xubinka si aad u joojisid wicitaanada telefoonka ama qoraallada.

### **Ka warran ahddii aad su'aalo qabtid?**

Haddii aad su'aalo ka qabtid shuruudaha sirnimada ama aad doonaysid imaad ogaato xuquuqdaada fadlan wac lamabarka adeega xubnaha oo ah **1-855-690-7800**. Haddii aad dhgola'dahay ama dhaga culustahay, wa **TTY 711**.

### **Ka warran haddii aad ashtako qabtid?**

Waxaan halkan u joognaa in aynu dadku caawino. Haddii aad dareentid in macluumaatkaagi PHI aanay amaan ku jirin waxaad wici kartaa lamabarka adeega xubnaha ama la xidhiidh Department of Health and Human Services. Ma jiraan wax xun oo kugu dhici doona haddii aad cabatid.

### **Warqad u qor amam wac Department of Health and Human Services:**

Office for Civil Rights

U.S. Department of Health and Human Services

233 N. Michigan Ave., Suite 240

Chicago, IL 6060

Telefoonka: 1-800-368-1019

TDD: 1-800-537-7697

Faakiska: 1-312-886-1807

Waxaynu ilaalinaa xuquuqda lagu bedelo ogeysiiskan Xeerka La-xisaabtanka iyo Ceymiska Caafimaadka la Guurin karo (HIPAA) iyo qaababka aynu uga dhigayno macluumaadkaaga caafimaadka la ilaaliyay (PHI) kuwo ammaan ah. Haddii ay midaasi dhacdo, waxaynu kuu sheegi doonaa isbedelada lagu sameeyo wargayska. Ama ku soo qor bogga ee [www.anthem.com/wisconsin](http://www.anthem.com/wisconsin).

### **Isir, cirqi iyo af**

Waxaanu ka helna xogag ku saabsan isirkaaga, cirqigaaga iyo afkaaga ka helnaa wakaalada Medicaid ee gobolka iyo Children's Health Insurance Program. Waxaynu u ilaalinaa macluumaadkan sida loogu sharxay ogeysiiskan.

Waxaan u isticmaalaynaa macluumaadkan si:

- Aynu u hubsano in aad heshid daryeelka aad u baahan tahay
- Aynu u samayno barnaamijyo lagu wanaajinayo natijjooyinka caafimaadka
- Aynu u samayno una dirno macluumaadka waxbarashada caafimaadka
- Aynu ugu sheegno takhtarada waxyaabaha ku saabsan baahiyahaaga luuqadeed
- Aynu u bixino adeegyo turjumaan

Innagu uma adeegsanno xogahan sia:

- Aynu ugu soo saarno ceymis caafimaad
- Aynu ugu go'aamino inta ay la'egtahay lacagta lagaaga qaadayo adeegyada
- Aynu u xadidno dheefta
- Aynu ugu sii deyno dadka isticmaalayaasha ah ee aan loo oggolaanin

### **Macluumaadka shakhsiga ah**

Waxaynu u weyddiisan karnaa, u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga shakhsiyeed (PI) sida aynu ugaga soo hadalnay ogeysiiskan. Macluumaadkaaga shakhsiyeed (PI) ma ahan kuwo dadweyne waxayna noo sheegayaan qofka aad tahay. Inta badan waxaa loo qaataa sababo ceymis.

- Waxaynu u isticmaali karnaa macluumaadkaaga shakhsiyeed (PI) si aynu u gaarno go'aano ku saabsan:
  - Caafimaadkaaga
  - Dabeeecadahaaga
  - Hiwaayadahaaga
- Waxaynu ka heli karnaa macluumaadka shakhsiyeed (PI) ee adiga kugu saabsan dad kale ama kooxo sida:
  - Takhaatiir
  - Cusbitaalo
  - Shirkado ceymis kale
- Waxaynu la wadaagi karnaa macluumaadka shakhsiyeed dad ama kooxo ka baxsan shirkadeena ayada oo aan jirin adiga OGGOLAANSHAHAAAGA xaaladaha qaarkooda.
- Waynu kuu sheegi doonaa kahor inta aynaan waxba samaynin halkaas oo aynu kugu siinayno fursad aad ku diidid.
- Waxaynu kuu sheegi doonaa sida la inoogu soo sheegayo haddii aadan doonaynin in aynu isticmaalno ama dad la wadaagno macluumaadkaaga shakhsiyeed (PI).
- Waxaad xaq u leedahay in aad aragtid oo aad bedeshid macluumaadkaaga shakhsiyeed (PI).
- Waxaynu hubsanaynaa in macluumaadkaaga shakhsiyeed laga dhigo mid ammaan ah.

RDib loo eegay Febraayo 5, 2018



## la xidhiidhkaagu waa muhiim

Dadka qabba naafooyinka ama dadka ku hadla luuqad aanan ahayn luuqada Ingiriiska, waxaynu ku siinaa adeegyadan si bilaash ah oo aan adiga wax lacag ah kuugu fadhin:

- Turjubaano luuqada dadka dhagoolayaasha ah kuwaas oo u qalma
- Qalab ku qoran khad waaweyn, dhagaysi, eliktaroonig, iyo qaabab kale ah
- Caawimaad ay kugu caawiyaan turjubaano u qalmo luuqada aad ku hadashid
- Qalab ku qoran luuqada aad ku hadashid

Si aad u heshid adeegyadan, wac lambarka Adeegyada Xubinka ee ku qoran kaarkaaga Aqoonsiga. Amam waxaad la xidhiidhi kartaa lambarka abuukaataha xubnaha oo ah **1-262-523-2424**.

Anthem Blue Cross and Blue Shield oo hoos tagta shuruucda Xuquuqda muwaadinnimada ee federaalka. Anagu dadka kuma midab takoorno sababo la xiriira:

- |           |                      |                           |
|-----------|----------------------|---------------------------|
| • Isirika | • Asalka dhallashada | • Naafonimada             |
| • Midabka | • Da'da              | • Aqoonsiga jinsiga qofka |

Midaasna macnaheedu waxay tahay anagu kuuma saarayno ama kuulama dhaqmayno si ka duwan dadka kale sabab arrimahaan la xiriira darteeda.

### xuquuqdaada

Ma dareentaa in aadan helin adeegyadan ama in aynu kuugu samaynay midab takoor adiga lid kugu ah sababaha kor lagu soo sheegay dartooda? Haddii ay haa tahay, waxaad soo diri kartaa sheegasho (cabasho). Ku soo dir boostada ama telefoonka:

Member Advocate  
N17 W 24340 Riverwood Drive  
Waukesha, WI 53188

Telefoon: **1-262-523-2424**

**Miyaad u baahanatahay caawimaad xagga xaraynta?** Ka wac Maamulaha Abuukaataha Xubinka lambarka kor ku qoran. Waxaad u xarayn kartaa ashtako ku saabsan xuquuqda muwaadinnimada U.S. Department of Health and Human Services, Office for Civil Rights:

- **Oo bogga internetka ku taal:** <https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf>
- **Boosta oo loo raaciyo:** U.S. Department of Health and Human Services  
200 Independence Ave. SW  
Room 509F, HHH Building  
Washington, DC 20201
- **Telefoon ahaan:** **1-800-368-1019 (TTY/TDD 1-800-537-7697)**

For a complaint form, visit [www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html](http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html).

**ATTENTION:** If you speak English, language assistance services are available to you free of charge. Call 1-855-690-7800 (TTY: 711).

**ATENCIÓN:** Si habla español, los servicios de asistencia de idiomas están disponibles sin cargo, llame al 1-855-690-7800 (TTY: 711).

CEEB TOOM: Yog koj hais lus Hmoob, kev pab rau lwm yam lus muaj rau koj dawb xwb. Hu 1-855-690-7800 (TTY: 711).

注意：如果您说中文，您可获得免费的语言协助服务。请致电  
1-855-690-7800 (TTY 文字电话: 711).

DIGTOONI: Haddii aad ku hadasho afka Soomaaliga, adeegyada caawimaadda ee xagga luqadda waa kuu diyaar iyagoo bilaash ah. Wac 1-855-690-7800 (TTY: 711).

ບໍ່ມາຢູ່ເກມ: ຖ້າທ່ານເວົ້າພາສາລາວ, ທ່ານສາມາດໃຊ້ການບໍລິການ  
ຈ່ວຍເຫຼືອດ້ານພາສາໄດ້ໂດຍບໍ່ແສຍຄ່າ. ໂທ 1-855-690-7800  
(TTY: 711).

**ВНИМАНИЕ:** Если Вы говорите по-русски, Вам будут бесплатно предоставлены услуги переводчика. Позвоните по номеру: 1-855-690-7800 (TTY: 711).

ကျေးဇူးပြု၍ နားဆင်ပါ - သင်သည် မြန်မာစကားပြောသူဖြစ်ပါက၊  
သင့်အတွက် အခမဲ့ဖြင့် ဘာသာစကားကူညီရေး ဝန်ဆောင်မှုများ  
ရရှိနိုင်သည်။ 1-855-690-7800 (TTY: 711) တွင် ဖန်းခေါ်ဆိုပါ။

تنبيه: إذا كنتم تتحدثون العربية، تتوفر لكم مساعدة لغوية مجانية. اتصلوا بالرقم 7800-690-855-1 (هاتف نصي: 711).

**PAŽNJA:** Ako govorite srpsko-hrvatski imate pravo na besplatnu jezičnu pomoć. Nazovite 1-855-690-7800 (telefon za gluhe: 711).

**ACHTUNG:** Wenn Sie Deutsch sprechen, stehen Ihnen kostenlos Sprachhilfsdienste zur Verfügung. Rufen Sie die folgende Nummer an: 1-855-690-7800 (TTY: 711).

**주의:** 한국어를 쓰시는 경우, 언어 지원 서비스가 무료로 제공됩니다. 1-855-690-7800 (TTY: 711) 번으로 연락해 주십시오.

**CHÚ Ý:** Nếu bạn nói tiếng Việt, thì có sẵn các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí cho bạn. Hãy gọi 1-855-690-7800 (TTY 711).

**GEB ACHT:** Wann du Pennsylvaanisch Deitsch schwetscht, Schprooch Helfe Services sin meeglich mitaus Koscht. Ruff 1-855-690-7800 (TTY: 711)

**ATTENTION :** Si vous parlez français, les services d'assistance linguistique vous sont accessibles gratuitement. Appelez le numéro 1-855-690-7800 (TTY : 711).

**UWAGA:** Jeśli mówisz po polsku, usługi wsparcia językowego są dostępne dla Ciebie bezpłatnie. Zadzwoń pod numer 1-855-690-7800 (TTY: 711).